

Shaqo La'aanta dhallinyarada iyo amniga Soomaaliya Mudnaansiinta shaqo abuurka si loo gaaro xasillooni



Abriil 2022

Tusmada

Nuxurka Daraasadda	5
1. Hordhac	7
1.1 Habraaca daraasadda	9
2. Gogoldhigga Milicsiga Daraasadaha	10
2.1 Qeexitaanka aragtida shaqo la'aanta iyo amniga	10
2.2 Guudmarka marxaladaha shaqada dhallinyarada	12
2.3 Caqabadaha dhallinyarada ka haysta suuqa shaqada ee fadhiidka ah	14
2.4 Shaqo la'aanta dhallinyarada iyo amni darrada	16
3. Natijjada Daraasadda iyo Falanqaynta	20
3.1 Xogta ka qaybgalayaasha daraasadda	20
3.2 Heerka shaqo la'aanta dhallinyarada	22
3.3 Farqiga jinsiga ee u dhaxeeya shaqo abuurka dhallinyarada	24
3.4 Caqabadaha dhallinyarada ka haysta shaqaalaysiinta	28
3.5 Saamaynta uu karoonuhu ku leeyahay fursadaha shaqo	30
3.6 Caqabadaha amniga	31
3.7 Waxyaabaha keena amni darrada iyo rabshadaha	33
3.8 Dhallinyarada bilaa shaqada ah ee ku biiraya dagaal ogayaasha	36
4. Gunaanad	39
5. Talooyin Siyaasadeed	40

Jaantusyada

Jaantuska 1-aad: Da'da	19
Jaantuska 2-aad: Jinsiga	19
Jaantuska 3-aad: Waxbarashada	21
Jaantuska 4-aad: Heerka Shaqada	22
Jaantuska 5-aad: Fursadaha shaqo ee ragga iyo dumarka	24
Jaantuska 6-aad: Boqolkiiba inta shaqo ka raadinaysay ka qaybgalayaasha	25
Jaantuska 7-aad: Kala doorashada waaxaha shaqada	26
Jaantuska 8-aad: Waxyaabaha saameeya doorashada shaqada	26
Jaantuska 9-aad: Caqabadaha hortaagan helitaanka shaqada	27
Jaantuska 10-aad: Wawa aan rumaysanahay in Karoonuhu saamayn ku yeeshay fursaddayda shaqo	30
Jaantuska 11-aad: Dhibaatooyinka amni ee ugu waawayn	31
Jaantuska 12-aad: Xaaladda amniga	31
Jaantuska 13-aad: Waxyaabaha dhallinyarada ku riixa ka qaybgalka rabshadaha	33
Jaantuska 14-aad: Wawa aan aamminsanahay in shaqo la'aantu keento fal-danbiyeedyada dalka ka dhaca	34
Jaantuska 15-aad: Wawa aan aamminsanahay in dhalliyarada bilaa shaqada ahi u nugushahay shaqaalaysiinta kooxaha rabshadaha wada	36
Jaantuska 16-aad: Wawa aan rumaysanahay in barnaamijyada shaqadu yaraynayaan rabshadaha dhallinyarada	36

Copyright © 2022 | Heritage Institute, All Rights Reserved.

Dr. Uweis Abdulahi Ali is the lead author of this study.

Readers are encouraged to reproduce material for their own publications, as long as they are not being sold commercially. As copyright holder, Heritage Institute requests due acknowledgement and a copy of the publication. For online use, we ask readers to link to the original resource on the Heritage Institute website.

© Heritage Institute 2022.

Nuxurka Daraasadda

Muddo tobannaan sano ku siman, ayey dadka Soomaalidu la daalaadhacayeen saboolnimo aad u daran, dhaqaale la'aan baahsan iyo horumar bulsho oo aad u hooseeya. Soomaaliya waxa ay ka mid tahay dalalka ugu dhallinyarada badan dunida, dadkeedana boqolkiiba 80 ayaa ka yar 35 jir. Dhallinyaradaasi haddii ay heli lahaayeen waxbarasho wanaagsan, xirfad aqooneed iyo fursado shaqo, waxa ay noqon lahaayeen awood shidaalisa koritaanka bulsho, horumarka nololeed iyo koboca dhaqaale ee waddankooda. Si kastaba ha ahaatee, daraasado badan ayaa tilmaamaya horumar la'aanta iyo tamarin la'aanta cududda dhallinyarada Soomaaliya.

Iyada oo laga duulayo sahan loogu kuurgalay todoba magaalo oo Soomaaliya ah ka mid ah, waxa ay warbixintani si qoto dheer diiradda u saaraysaa isbeddellada, fursadaha, yoolasha, iyo dareennada ku gadaaman shaqo la'aanta dhallinyarada Soomaaliya. Ka dibna waxa ay falanqaynaysaa sida ay dhallinyarada bilaa shaqada ahi ugu nugushahay ku biiritaanka kooxaha xagjirka ah-argagixisada, colaad oogayaasha beelaha, maleeshiyaadka hubaysan ee siyaasadda iyo qawlaysatada waxdhacda. Ugu danbayn, daraasaddu waxa ay u kuurgalaysaa siyaabaha loo aasaasi karo barnaamijyo shaqo abuur, kuwaas oo lagaga hortagi karo in ay dhallinyaradu noqoto xaabo lagu huriyo rabshadaha iyo dagaallada dalka aafeeyay.

Sida ay muujinayso natijada daraasaddani, boqolkiiba 70 ayaa bilaa shaqo ahaa dhallinyaradii ka qaybgalay sahamintan. Marka loo eego ka qaybgalayaashii daraasadda, shaqo la'aantu waxa ay ku badnayd haweenka dhallinyarada ah. Ka qaybgalayaashu waxa ay hoosta ka xarriiqeen in labada qodob ee shaqo la'aanta keenay yihiin; shaqo la'aan guud oo dalka ka jirta iyo qaraabokiil. Marka laga yimaaddo xaddidnaanta fursadaha shaqo, dhallinyaradu waxa ay qabaan in qaraabokiilka iyo qolo ku shaqaalaysiintu yihiin caqabadaha guunka ah ee hortaagan in dhallinyaradu shaqooyin ku habboon ka helaan hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Sidaa darteed, dhallinyaro badan ayaa aad uga walbahaarsan caddaalad darrada ka jirta suuqa shaqada ee fadhiidka ah, kaas oo abuuray dareennada la xiriira haybsooca dhaqaalahi iyo cabashooyinka shaqo. Waxa kale oo daraasaddan lagu ogaaday in horumar la'aanta xirfadeed iyo khibrad yaraanta dhallinyaradu yihiin caqabadaha is hortaagay in dhallinyaradu shaqo ka hesho Soomaaliya. Intaa waxa dheer, sida dunidaba ka jirta, daraasaddani waxa ay muujinaysaa in Karoonaha dhimay furasadaha shaqo ee ay dhallinyarada Soomaaliyeed helayaan, iyada oo ay boqolkiiba 67 dhallinyaro ahi ku cawdeen in cudurkani caqabad ku noqday helitaankooda shaqo.

“

*Dhallinyaro badan
ayaa aad uga
walbahaarsan
caddaalad
darrada ka jirta
suuqa shaqada
ee fadhiidka ah,
kaas oo abuuray
dareennada la
xiriira haybsooca
dhaqaalahi iyo
cabashooyinka
shaqo*

“

*Tusaale ahaan,
boqolkiiba 58
dhallinyaradii
sahamintan ka
qaybqaatay waxa
ay sheegeen in
ay shaqo la'aantu
tahay sababta ugu
wayn ee keentay
in dhallinyaradu ku
biiraan kooxaha
xagjirka ah*

Natiijooyinka warbixintan ayaa si aan mugdi ku jirin u shaacinaysa doorka ay shaqo la'aanta dhallinyaradu ku leedahay arrimaha la xiriira colaadaha, kuwaas oo wiiqaya rajada fog ee mustaqbalka amniga iyo xasilloonida Soomaaliya. Dhallinyaradii daraasaddan ka qaybgashay ayaa xusay in ay soo bateen danbiyada la xiriira rabshaduhu, isla markaana yihiin dhibaatooyin waaweyn oo ay kala kulmaan dhinaca amniga. Tusaale ahaan, boqolkiiba 58 dhallinyaradii sahamintan ka qaybqaatay waxa ay sheegeen in ay shaqo la'aantu tahay sababta ugu wayn ee keentay in dhallinyaradu ku biiraan kooxaha xagjirka ah. Tani waxa ay ina tusaysaa, mar haddii aanay jirin ilo dhaqaale oo sharci ahi, in dhallinyaradu beddelkeeda u arkeen dembiyada rabshadaha wata hab-nololeed iyo badbaado nafeed oo loo quud raadsado. Sida oo kale, warbixintan yaa lagu ogaaday in barnaamijyada shaqo abuurku ay ka qaybqaadanayaan amniga, taasna waxa daliil u ah boqolkiiba 70 ayaa dhallinyaradii daraasaddan ka qaybgalay xustay in barnaamijyada shaqo abuurku laf dhabar u yihiin xallinta caqabadaha amni ee dalka ka jira. Waxa intaas dheer, in boqolkiiba 34 dhallinyaradaas ka mid ahi ay shaqada koowaad u doorbideen mid ay iskood u shaqaystaan oo madaxbannaan, iyaga oo kaalinta labaad iyo ta saddexaad soo galiyey u shaqaynta hay'adaha dawladda iyo waaxda gaarka loo leeyahay.

“

*Marka la
tixraaco natijada
daraasaddan,
waxa loo baahan
yahay in si degdeg
ah wax looga
qabto arrintan,
si looga gudbo
dhibaatooyinka
amni ee ay keentay
shaqo la'aanta
dhallinyaradu*

Worbixintu waxa ay ku talinaysaa in la qaado tallaabooyin dhaqaale oo lagaga falcelinayo xaaladda jirta, kuwaas oo ay ka mid yihiin, in dhallinyarada loo badiyo fursadaha shaqooyinka ku habboon. Marka la tixraaco natijada daraasaddan, waxa loo baahan yahay in si degdeg ah wax looga qabto arrintan, si looga gudbo dhibaatooyinka amni ee ay keentay shaqo la'aanta dhallinyaradu. Tallaabooyinka horumarka leh, ee loo qaadayo dhanka shaqo abuurka dhallinyarada Soomaaliyeed, waxa ugu muhiimsan dib u soo nooleynta mashaariicda waawayn ee shaqooyinka dawligha ah. Samaynta iyo dayactirka hayalka dawligha ah, sida waddooyinka iyo dhismayaasha dawladda, waxa ay keenayaan shaqo abuur, waxaanay horumarinayaan xirfadaha dalka gudihiisa, sida oo kale waxa ay dib u dhisayaan ilaha dhaqaale ee dalka.

Ugu danbayn, daraasaddu waxa ay soo jeedinaysaa in la sameeyo haayado nidaamsan oo ganacsatada yaryar siiya fursado ay dhaqaale ku helaan. Waa muhiim in dhallinyarada bilaa shaqada ah lagu dhiirrigaliyo in ay iskood u shaqaystaan. In la abuuro xarumo daymiya lacago yaryar oo ay ku shaqaystaan ayaa xataa wax dhan u taraysa. Sida oo kale, waa in ay dowladda Federaalka Soomaaliya iyo dowlad goboleedyadu bilaabaan qorshe ay hay'adaha dawladda kaga shaqaalaysiinayaan ardayda ka soo baxda jaamacadaha ee bilaa shaqada ah, sida in laga hawlgaliyo wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda.

Daneeyayaasha Soomaaliya ee ku hawllan ballaarinta shaqo abuurka waa in ay ku dadaalaan wax ka beddelka ilaha dhaqaale ee hadda jira oo ah kuwo wax soo saarka qiimahoodu hooseeyo si loogu guuro kuwo casri ah oo wax soo saarka qiimahoodu sarreeyo, kuwaas oo shaqo abuur u samaynaya dhallinyarada. Horumarku, waxa uu ku jiraa in daneeyayaasha Soomaaliya ay kor u qaadaan fursadaha shaqo ee kala duwan, taasi waxa ay keenaysaa in dhaqaalaha loo helo ilo wax soosaar oo kala sarreeya, isla markaana ka casriyasan kuwa hadda jira, taasina waaxa ay suurigalinaysaa in dhallinyarada loo sameeyo shaqo abuur.

In dhallinyarada loo sameeyo barnaamijyo shaqo oo ku salaysan dhaqaalaha casriga ah ayaa muhiimad wayn u ah Soomaaliya. Shaqo abuurka casriga ah ee suuqa leh ayaa dhallinyarada Soomaaliyeed ka caawin kara in ay bilaabaan ganacsiyo horumarsan oo tignoolajiyadeed, si ay u abuuraan shaqooyin wax ku ool ah, kuwaas oo kor u qaadaya dhaqaalaha Soomaaliya. Arrintani waxa ay u baahan tahay in ay iska kaashadaan daneeyayaasha kala duwani, sida xarumaha tacliinta sare, dawladda Soomaaliya iyo saaxiibada caalamka ee horumarka ka shaqeeya, si ay u maalgaliyaan barnaamijyo tababar oo ku saabsan xirfadaha casriga ah ee xawaaraha dheer, kuwaas oo dhallinyarada Soomaaliya ka caawinaya in ay si buuxda uga faa'iidaystaan dhaqaalaha casriga ah.

1. Hordhac

“
Saamaynta
uu dagaalku
ku yeeshay
dhallinyarada
Soomaaliya, gaar
ahaan kuwa bilaa
shaqada ah iyo
kuwa shaqadoodu
liidato, ayaa
ah dhibaatada
ugu wayn ee
hor taagan
siyaasiyiinta
Soomaaliya

Soomaaliya oo ay aafeeyeen dagaallo dabatdheeraaday, ayaa ka soo doogaysa burbur saameeyay bulsho ahaan, dhaqaale ahaan iyo haykal ahaanba.¹ Dagaalladaas waxa ku dhintay boqollaal kun oo qof waxaana ku barakacay malaayiin kale.² Dagaalladii Soomaaliya ka dhacay waxa xuddun u ahaa dhallinyarada Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa reer miyiga ah.³ Saamaynta uu dagaalku ku yeeshay dhallinyarada Soomaaliya, gaar ahaan kuwa bilaa shaqada ah iyo kuwa shaqadoodu liidato, ayaa ah dhibaatada ugu wayn ee hor taagan siyaasiyiinta Soomaaliya. Sida ay sheegayso warbixin ka soo baxday Xafiiska Tirakoobka Qaranka, waxa hormurka iyo xasilooniда dalka caqabad ku ah dhallinyarada badan ee shaqo la'aantu haysato, kuwaas oo dadoodu ka yar tahay 35 jir.⁴ In badan oo dhallinyaradaas ka mid ahi ma haystaan fursado ay ku bartaan xirfado shaqo.⁵ Waa in dawladdu muhiimadda koowaad siiso sidii fursado shaqo iyo xirfado aqooned loogu abuuri lahaa dhallinyaradan badan ee sii kordhaysa, maadaama oo ay yihiin lafdhabarta horumarka iyo ilaalinta amniga dalka.

1. Development Initiatives Report. (2016). Somalia: an overview of poverty, vulnerability and financing. Retrieved from: <http://www.devinit.org/wp-content/uploads/2016/08/Somalia-an-overview-of-poverty-vulnerability-and-financing.pdf>

2. World Bank. (2018). Youth as Agents of Peace in Somalia. Find more at: <https://documents1.worldbank.org/curated/en/463921526414702925/pdf/126251-WP-P152600-PUBLIC-Youth-As-Agents-of-Peace-Somalia.pdf>

3. Ibid

4. National Bureau of Statistics. (2020). Somalia Facts and Figures. Accessed at: https://www.nbs.gov.so/wp-content/uploads/2021/11/Somalia-facts-and-figures_2020.pdf

5. Karamba, Wendy. 2021. Improving Access to Jobs for the Poor and Vulnerable in Somalia. World Bank, Washington, DC. <https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/34983>

“

Jiritaanka kooxaha xagjirka ah waxa ka qaybqaatay, oo dhibtooda uga sii daray dhallinyarada bilaa shaqada ah. Sida ay qabaan aqoonyahan badani, dagaalladu waxa ay saamaynta ugu wayn ku yeeshen dallinyarada, waxaanay aad ugu nugul yihiin in ay ku biiraan kooxaha hubaysan.⁷ Haddii aynnu ku soo dhawaanno sangaabta falanqaynta, nidaamka bulsho iyo suuqa hadda jiraa ma awoodaan in ay dhallinyarada u abuuraan fursado dhaqaale oo wax ku ool ah.⁸ Xaaladaha kacsan ee sii kordhaya iyo rejo la'aanta dhallinyaradu waa kuwo si dadban ula xiriira saboolnimada, shaqo la'aanta iyo dawlad xumada dalka ka jirta.⁹ Daraasaddani waxa ay falanqaynaysaa sababaha keenay baahsanaanta shaqo la'aanta dhallinyarada Soomaaliya iyo caqabadaha ku gadaaman shaqo abuurka. Iyada oo laga duulayo sahan daraasadeed ay ka qaybgaleen 1000 dhallinyaro ah, oo ku kala nool todoba magaalo, ayaa loo kuurgalay xiriirka ka dhaxeeya shaqo la'aanta dhallinyarada iyo nuglaanshaha amniga dalka.

Qorshaha Horumarka Qaranka ee Soomaaliya, ayaa xasilooniida iyo amniga, koboca dhaqaalaha iyo horumarinta cududda bulshada ku suntay saddexda tiir ee ay ku taagan yihiin dawlad wanaagga iyo horumarku. Tiirka labaad iyo ka saddexaad ayaa ku nuuxnuuxsanaya dib u soo noolaynta dhaqaalaha iyo ballaarinat fursadaha shaqo, si loo daboolo dhaqo la'aanta iyo shaqo xumaanta baahsan, waxaanu si gaar ah diiradda u saarayaa in dhallinyarada magaaloooyinka iyo kuwa miyiga laga shaqaalaysiyo waaxaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn.⁶

Jiritaanka kooxaha xagjirka ah waxa ka qaybqaatay, oo dhibtooda uga sii daray dhallinyarada bilaa shaqada ah. Sida ay qabaan aqoonyahan badani, dagaalladu waxa ay saamaynta ugu wayn ku yeeshen dallinyarada, waxaanay aad ugu nugul yihiin in ay ku biiraan kooxaha hubaysan.⁷ Haddii aynnu ku soo dhawaanno sangaabta falanqaynta, nidaamka bulsho iyo suuqa hadda jiraa ma awoodaan in ay dhallinyarada u abuuraan fursado dhaqaale oo wax ku ool ah.⁸ Xaaladaha kacsan ee sii kordhaya iyo rejo la'aanta dhallinyaradu waa kuwo si dadban ula xiriira saboolnimada, shaqo la'aanta iyo dawlad xumada dalka ka jirta.⁹ Daraasaddani waxa ay falanqaynaysaa sababaha keenay baahsanaanta shaqo la'aanta dhallinyarada Soomaaliya iyo caqabadaha ku gadaaman shaqo abuurka. Iyada oo laga duulayo sahan daraasadeed ay ka qaybgaleen 1000 dhallinyaro ah, oo ku kala nool todoba magaalo, ayaa loo kuurgalay xiriirka ka dhaxeeya shaqo la'aanta dhallinyarada iyo nuglaanshaha amniga dalka.

Ujeeddooyinka daraasadda

Daraasaddan waxa looga golleeyahay in lagaga gunaaro, ujeeddooyinkan soo socda:

1. Qiimaynta xaaladda (heerka iyo sababta) shaqo la'aanta dhallinyarada Soomaaliya;
2. Qeexitaanka waxyaabaha ka qaybqaata shaqo la'aanta dhallinyarada;
3. Fahamka mashaariicda socda, qorshayaashooda iyo shuruucda saamaynta ku leh shaqo la'aanta ka jirta heerarka kala duwan ee dawladda iyo waaxaha gaarka loo leeyahay;
4. Baarista xiriirka ka dhaxeeya shaqo la'aanta dhallinyarada iyo xasilooni darrada iyo khataraha amniga;
5. Talo siinta jaangooyeyaasha siyaasadda ee ay qusayso arrintani iyo guud ahaan daneeyayaasha shaqada;

6. Ministry of Planning, Investment and Economic Development. (2020). Somalia National Development Plan-9. Can be accessed at: <https://mop.gov.so/wp-content/uploads/2019/12/NDP-9-2020-2024.pdf>

7. Ismail, O., & Olonisakin, F. (2021). Why do youth participate in violence in Africa? A review of evidence. *Conflict, Security & Development*, 21(3), 371-399. Accessed at: <https://www.tandfonline.com/doi/full/10.1080/14678802.2021.1933035>

8. Ibid.

9. Karamba Wendy. (2021). Improving access to Jobs for the Poor and Vulnerable in Somalia. World Bank, Washington DC. Accessed at: <https://openknowledge.worldbank.org/bitstream/handle/10986/34983/Improving-Access-to-Jobs-for-the-Poor-and-Vulnerable-in-Somalia.pdf?sequence=5&isAllowed=>

1.1 Habraaca daraasadda

Marka laga yimaaddo dib u milicsiga daraasado hore iyo xogo la kaydiyay (secondary data), qorshe daraasadeedkani waxa uu ka duulayaa sahan bilihii Oktobar iyo Nofembar lagu sameeyay todoba magaalo oo waawayn, kuwaas oo kala ah Kismaayo, Baydhabo, Muqdisho, Baladweyne, Gaalkacayo, Garoowe iyo Boosaaso. Magaaloooyinkan waxa lagu xushay galaangalkooda iyo dhaqdhaqaqyadooda dhaqaale. Waxa la qaybiyay su'aalo lagu sahaminayo figradaha ay dhallinyaradu ka haystaan waxyaabaha shaqo la'aanta ku keena, yididiilooyinkooda shaqo, waxa ay amniga ka aamminsan yihiin, rabshada iyo dagaallada iyo waliba waxa ay ka aamminsan yihiin xiriirka ka dhaxeeya shaqo la'aanta iyo amni darrada.

Cilmibaareyaashu waxa ay xogta ku soo ururiyeen nidaamka xog ururinta moobillada ee loo yaqaanno (Open Data Kit). Waxa intaa dheer, daraasaddu waxa ay tixraac ku samaysay xogaha kaydsan iyo daraasadihii hore looga sameeyay mawduucan. Ugu danbayn, daraasaddu waxa ay soo xiganaysaa natijjooyinkii ka soo baxay doodaha guud ee caalamiga ah, ee ku saabsan shaqo la'aanta dhallinyarada iyo amniga. Daraasaddan waxa laga sameeyay maagaaloojin reer magaalku ku badan yahay oo muhiimad wayn u leh dhaqaalahi iyo xoogsiga. Magaaloooyinkan waxa yimaadda dhallinyaro badan oo shaqo doon ah, isla markaana fursado shaqo ka raadinaya waaxaha dadwaynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay iyo waliba ururrada aan dawliga ah. Bishii Oktoober ilaa iyo Nofember 2021-kii, waxa xog daraasadeed laga soo uruuriyey 990 qof, oo si qorituur lagaga soo xushay todoba magaalo oo la doorbiday in laga sameeyo warbixintan. Muqdisho waxa ka qaybqaatay 391 qof, Garoowe waxa ka qaybqaatay 103, Baydhabo iyo Kismaayo waxa ka qaybqaatay 101, Baladweyn waxa ka qaybqaatay 100, halka Boosaaso iyo Gaalkacayo ay ka qaybqaateen 97 qof. Xog ururiyeyaa ay kormeerayaan cilmibaareyaasha Machadka Heritage ayaa tagay, isla markaana xog ka soo ururiyey goobo badan, oo ay ka mid yihiin huteello cunto, maqaaxiyo shaah, garoonno ciyaareed iyo suuqaq cammiran.

Shaxanka 1: Magaalooinka ay kala joogaan ka qaybgalayaashu

Magaalada	Meelaha ay kala joogaan ka qaybgalayaashu	Boqollayda
Baydhabo	101	10%
Beledweyn	100	10%
Boosaaso	97	10%
Gaalkacayo	97	10%
Garoowe	103	10%
Kismaayo	101	10%
Muqdisho	391	40%
Wadarta	990	100%

Hal dhalil ayaa ahayd in aanay ka qaybgalayaashu si buuxda u metelayn dhamaan dhallinyarada Soomaaliya, sidaa daraadeed, waxa laga yaabaa in qiyaasta daraasaddu yarayso xaddiga dhabta ah ee dhallinyarada bilaa shaqada ah. Sidaa darteed, waa in laga taxaddaraa sidii loo gaari lahaa gunaanad si guud u koobaya dhamaan arrimaha la xiriira shaqo la'aanta dhallinyarada. Waxa kale oo muhiim ah in loo dhugyeesho in ay natijada daraasaddani ku taxaluqdo sahanka tirakoobka ee loo yaqaanno (descriptive statistics), kaas oo aan lagu ogaan karin xiriirka ka dhaxeeya shaqo la'aanta dhallinyarada iyo amniga.

2. Gogoldigga Milicsiga Daraasadaha

2.1 Qeexitaanka aragtida shaqo la'aanta iyo amniga

Maadaama oo ay tahay arrin kakan oo dhinacyo badan laga eegi karo, ma jirto aragt dunidu ka midaysan tahay oo lagu qeexayo waxa ay tahay shaqo la'aanta dhallinyaradu. Dalal badan ayaa u dajiyay qeexitaanno ka turjumaya baahiyahooda gaarka ah. Ururka Shaqaalaha Adduunka(ILO) ayaa shaqo la'aanta dhallinyarada ku qeexay sidan soo socota: boqolkiiiba inta ay ka yihiin tirada guud ee xoogsatada dadka da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 29 jir, kuwaas oo diyaar u ah in ay shaqeeyaan, isla markaana shaqo doon ah balse waayey shaqo ay qabtaan.¹⁰ Ururka Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarka (OECD)¹¹ ayaa shaqo la'aanta dhallinyarada ku xaddiday 24 sano iyo wixii ka yar , kuwaas oo si firfircooni shaqo u raadinayay muddo afar todobaad ah.

Si guud, erayga dhallinyaro waxa uu u tilmaamayaa xilliga uu qofku iskaga gudbayo marxaladaha carruurnimo iyo tan qof waynnimo.¹² Arrintan ayaa ah mid lagu kala duwan yahay, waxaanu kala duwanaanshaheedu ku salaysan yahay dhaqammada, siyaasadaha, iyo dhaqan-dhaqaalaha dalalka, taas ayaana keentay in ay adkaato in la helo weedh kaliya oo si joogto ah loogu isticmaalo qeexitaanka dhallinyaranimada. Tusaale ahaan, Axdigaa Dhallinyarada Afrika ayaa hirgaliyay qeexitaan ballaaran, oo dhallinyaranimada ku koobaya dadka da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 34 sano. Qeexitaankan waxa qaataj dalal badan oo Afrikaan ah, waxaanu muujinayaa xaqiiqada horumarka Afrika, iyo sida oo kale dhibaatooyinka sida gaarka ah u soo foodsaara dhallinyarada. Tani waxa ay ka turjumaysaa in halbeegga lagu cabbirayo shaqo la'aanta dhallinyaradu ku tiirsan yahay xiriirka ka dhaxeeya heerarka horumar iyo marxaladaha da'eed ee la maro inta u dhaxaysa dhallinyaranimada illaa waayeelnimada.

10. ILO, Key indicators of youth labor markets: Concepts, definitions and tabulations (2009). Available at https://www.ilo.org/wcmsp5/groups/public/@ed_emp/documents/instructionalmaterial/wcms_140860.pdf

11. OECD, Youth unemployment rate (indicator) (2022), doi: 10.1787/c3634df7-en (accessed January 18, 2022).

12. United Nations' Definition of Youth. Retrieved from: <https://www.un.org/esa/socdev/documents/youth/fact-sheets/youth-definition.pdf>

Marka laga yimaaddo qeexitaannada kala duwan, shaqo la'aanta dhallinyarada waxa inta badan lagu qeexaa xaaladaha ay dhallinyaradu bilaa shaqada yihiin ama aanay awoodin in ay shaqo helaan. Qofkasta oo dhallinyaro ah oo badqaba, una diyaar ah inuu shaqaysto, balse waayay wax uu ka shaqeeyo ayaa lagu magacaabi karaa shaqo-laawe. Xaaladda Soomaaliya, ayaa si cad u muujinaysa sida ay u adagtahay in dhallinyaranimada lagu qeexo qorshayaasha siyaasadeed iyo falanqaynta daraasadda. Siyaasadda Dhallinyarada Qaranka ee Soomaaliya 2017, ayaa dhallinyarada u aqoonsan dadka da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 35 jir.¹³ Daraasaddan, oo muhiimad wayn siinaysa arrimaha dadwaynaha iyo isbeddellada la xiriira shaqaalaysiinta dhallinyarada ayaa lagu lafaguray qeexitaankan.

Sida oo kale, amniga ayaa siyaabo kala duwan loo micneeyay. Kan ugu macquulsan, ayaa ku micnaynaya ka fayoobaanta halis kasta. In kasta oo qeexitaanku ku xiran yahay xaqiqooyinka kala duwan ee siyaasadeed, dhaqan, dhaqaale iyo kuwo bulsho, haddana guud ahaan macneheedu waa ka gaashaamashada xoogagga dibadeed ee sababaya rabshado waawayn oo halis ku ah madaxbannaanida dalka, sugnaanta xuduudihiisa, iyo badbaadada waxyaabaha guud ee bulshada muhiimka u ah iyo dawlad leh agab awoodeed oo ku filan si ay isaga difaacdo khatarahaas.¹⁴ Sharraxaaddani waxa ay qabtaa in amni darrada loo fahmo ficol uu qof ama kooxo rabshadooleyaal ahi sameeyeen, taas oo inta badan la xiriirta siyaasad, dhaqaale, bulsho iyo aragti diimeed. Aqoonyahan kale ayaa soo bandhigay aragtiyo kala duwan oo ay ku gorfaynayaan amniga, kuwaas oo la xiriira xaalado gaar ah iyo aragtiyo la halmaala daraasaynta xiriirka caalamiga ah, cilmi-nafsiga, cilmiga-bulshada iyo dhaqaalah. Baldwin waxa uu soo bandhigay figrad gaar ah oo xanbaarsan aragti ballaaran oo casri ah, taas oo innoo jidaynaysa in aynnu xaalad kasta u isticmaallo amni. Amniga waxa uu ku qeexay “heerka ugu hooseeya ee ay waxyeello ku soo gaarto shay qiimo leh”.¹⁵ Qeexitaankan ka dib, Baldwin waxa uu tilmaamay laba qodob oo aasaasi ah, kuwaas oo loo adeegsan karo in lagu soo ururiyo figradda amniga: “amnigu yuu quseeyaa” iyo “amnigu qiimo intee leeg buu joogaa”.

Si kastaba ha ahaatee, iyada oo ku xiran su'aasha cilmibaarista ama arrinta, waxa ay ka jawaabaysaa su'aalo dheeraad ah sida “inta amnigu leegyahay,” khataraha ku gadaaman” “siday u dhici karaan” “qiimaha ay ku kacayaan” iyo “xilligay dhacayaan”, si loo yareeyo isfaham la'aanta, loona hirgaliyo qorsheyaal wax ku ool ah oo arrintan ku saabsan. Dhanka Soomaaliya, waxyaabaha amni darrada keenay waxaa ka mid ah xagiirnimada rabshadaha wadata, colaadaha qabiilka, malleeshiyaadka siyaasadeed ee hubaysan, tuugada hubaysan, iyo afduubka, kuwaas oo dalka u horseeday dhibaatooyin iyo dhimasho bulshada aafeeyay.¹⁶

13. The National Youth Policy of the Federal Government of Somalia, 2017. Available at: <https://somalia.unfpa.org/sites/default/files/pub-pdf/UNFPA%20Somalia%20National%20Youth%20Policy%20Eng%20fa.pdf>

14. E. Rothschild, What is security? *Daedalus*, 124(3) (1995), 53-98.

15. Baldwin, David A. (1997) The concept of security, *Review of International Studies* 23(1):5-26. <https://www.tau.ac.il/~daniel/pdf/37.pdf>

16. Ken Menkhaus. (2011). Somalia and the Horn of Africa. Available at: <https://documents1.worldbank.org/curated/en/494981468303085454/pdf/632040WP00WDR0009B0Somalia00PUBLIC0.pdf>

“

*Soomaaliya,
dhallinyarada bilaa
shaqada ahi waa
halka ay ka soo
shidaal qaataan
rabshadaha
siyaasadda,
dagaallada
beelaha, kooxaha
hubaysan ee
al-Shabaab iyo
shuftada hubaysan
ee wax dhaca-
dhammaantoodna
way sii
kordhayaan,
waxaanay u
dhacaan si
maalinle ah*

Tan macnaheedu waa in ay caqabad ku tahay badbaadada shaqsiyaadka ama la dagaallanka fal-dembiyeeddada sida argagixisada iyo noocyada kale ee rabshadaha colaadaha wata. Jackson-Preece, ayaa ku daray, in amniga qaranka loola jeedo siyaasadaha dawliga ah ee awoodda u siinaya in qaranku xaqijiyo badbaadadiisa bulsho, sida dalnimadiisa gaarka ah iyo madaxbannaanidiisa bulsho, sidaas samaynteeda, ayey ku imanaysaa badbaadada iyo barwaaqada muwaadiniintisu.¹⁷

Iminka waxa jira dhaqdhaqaqyo badan oo abuuraya xasilooni darro, iyaga oo rabshado u adeegsanaya wax ka qabashada dhibaatooyinka haysta. Saboolnimada, shaqo la'aanta, caafimaad darrada, iyo isbeddelka cimilada, oo dhammaantood ka qaybqaadanaya la'aanta adeegyada muhiimka ah, ayaa tusaale u ah xasilooni darrada.¹⁸ Shaqo la'aantu waxa ay dhibaato ku noqotay amniga qaranka, iyada oo dhallinyaradu culayska ugu badan ku leedahay. Soomaaliya, dhallinyarada bilaa shaqada ahi waa halka ay ka soo shidaal qaataan rabshadaha siyaasadda, dagaallada beelaha, kooxaha hubaysan ee al-Shabaab iyo shuftada hubaysan ee wax dhaca- dhammaantoodna way sii kordhayaan, waxaanay u dhacaan si maalinle ah. Qaar ka mid ah dhallinyarada bilaa shaqada ah iyo kuwa shaqooyinka liita ka shaqeeyaa ayaa ku kaca falal ay ka mid yihiin kufsi, danbiyo abaabulan, balwado iyo tuuganimo.¹⁹

2.2 Guudmarka marxaladaha shaqada dhallinyarada

“

*Sida ay
sheegayo,
daraasad 2019-kii
lagu sameeyay
shaqaalaha
xoogsatada ah ee
Soomaaliya, oo
ay wadarta guud
ee dhallinyaradu
ahayd 1,896,039,
waxa ka
shaqaynayey
264,607 qof
oo kaliya, taas
oo xaddiga
dhalliyarada ee
aan shaqaynin
ka dhigaysa
boqolkiiba 86*

Tirakoob dhawaan lagu sameeyay suuqa shaqada ayaa hoosta ka xarriiqaya saamaynta ay leedahay dhibaatada shaqo la'aanta dhalliyarada dalku. Sida ay sheegayo, daraasad 2019-kii lagu sameeyay shaqaalaha xoogsatada ah ee Soomaaliya, oo ay wadarta guud ee dhallinyaradu ahayd 1,896,039, waxa ka shaqaynayey 264,607 qof oo kaliya, taas oo xaddiga dhalliyarada ee aan shaqaynin ka dhigaysa boqolkiiba 86.²⁰ Si kastaba ha ahaatee, waxa laga yaabaa in aanay saxnimada xogtaasi dhammaystirnayn, maxaa yeelay sahankeedu waxa uu ka duulayay qiyaastii tirada dadwaynaha ee la sameeyay 2014-kii.²¹

Xogtu waxa ay muujinaysaa in shaqo la'aantu ku badan tahay dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 15-19 sano, sida ka muuqata shaxanka 2-aad, oo qiyaastii ka dhigaya boqolkiiba 95. Shaqo la'aanta hablaha dhallinyarada ah ee da'doodu u dhaxayso 15-19 sano, ayaa noqday 58.3 boqolkiiba, marka la barbardhigo wiilasha oo noqday 41.7 boqolkiiba. Xaddiga shaqo la'aanta xad dhaafka ah, waxa sababay la'aanta fursado dhaqaale, koboca dhaqaalaha Soomaaliya oo ah mid gaabis ah, una nugul carqaladaha, taanisa waxa ay keentay in shaqo abuurku adkaado.²²

17. Jackson Preece, Security in international relations, University of London (2009). Available at: <https://london.ac.uk/sites/default/files/uploads/ir3140-security-international-relations-study-guide.pdf>.

18 See Musana Jafali's (2021) article on how unemployment in Uganda is a real threat to national security. Available at: <https://thecfma.org/how-unemployment-in-uganda-is-a-real-threat-to-its-national-security/>.

19. World Bank. (2018). Youth as Agents of Peace in Somalia. <https://documents1.worldbank.org/curated/en/463921526414702925/pdf/126251-WP-P152600-PUBLIC-Youth-As-Agents-of-Peace-Somalia.pdf>

20. National Bureau of Statistics (NBS), 2019 Somalia labor force survey.

21. Ibid.

22. World Bank Report, Somalia Country Economic Memorandum: Towards an inclusive jobs agenda, 2021. Available at: <https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/35943>

Shaxanka 2: Shaqo la'aanta dhallinyarada Somaliya, 2019

Da'da	Wadarta Dhallinyarada	Dhallinyarada Shaqaysa	Dumarka	Ragga	Magaalada	Miyiga	Saammiga ka shaqeeya Jiil kasta
15 to 19	853,253	43,696	18,240	25,456	30,743	12,953	5.1
20 to 25	585,124	92,207	32,120	60,087	76,647	15,560	15.8
25 to 29	457,662	128,704	42,431	86,273	100,853	27,851	28.1
Total	1,896,039	264,607	92,791	171,816	208,243	56,364	13.9

Tixraaca: Xafiiska Tirakoobka Qaranka (XTQ).

Marka aanu jirin dhaqaale abuuraya shaqooyin badan, saamaynta ugu badan waxa uu ku yeelanaya dhallinyarada, taasina waxa ay keenaysaa in aanay dhallinyaro badani helin khibrad shaqo, tababarro iyo waxbarasho.

Waxa kale oo ay noqon kartaa tusaale muujinaya nidaamka waxbarashada, gaar ahaan farsamada gacanta, oo ah mid aan soo saarayn qalinjabiyeaal ku hubaysan xirfadhi loo baahnaa.²³ Shaqo abuurka dhallinyarada iyo tababarro wax ku ool ah, oo awood u siinaya in ay shaqaystaan dhallinyaradu ayaa ah caqabadaaha ugu waawayn ee haysta Soomaaliya. Sida ay sheegayso daraasad 2019-kii lagu sameeyay shaqaalaha xoogsatada ah, shaqo la'aanta dhallinyarada kama sinna miyiga iyo magaaladu, maxaa yeelay meelaha miyiga ah xaddiga shaqo la'aanta dhallinyaradu waa boqolkiiiba 25 kaliya. Guud ahaan, meelaha shaqo la'aantu ku badan tahay, saboolnimaduna way ku badan tahay, taasina waxa ay muujinaysaa in uu ka dhaxeeyo xiriir lama hilmaamaan ahi. Arrintani waxa ay si cad u muujinaysaa in hubka ugu culus ee saboolnimada iyo xasilooni darra lagu la dagaallami karaa uu yahay shaqo abuurka. Sida oo kale, shaqo abuurku waxa uu qayb libaax ka qaataa yaraynta saboolnimada, isaga oo keena in shaqaaluhu helaan mushaar ku filan. Fahamka shaqo la'aanta, gaar ahaan dhallinyarada, ayaa muhiimad wayn u leh horumarka ay Soomaaliya hadda u baahan tahay.

“

Shaqo abuurka dhallinyarada iyo tababarro wax ku ool ah, oo awood u siinaya in ay shaqaystaan dhallinyaradu ayaa ah caqabadaaha ugu waawayn ee haysta Soomaaliya

23. Heritage Institute and City University of Mogadishu, Productive labor and employment in Somalia, 2020.

2.3 Caqabadaha dhallinyarada ka haysta suuqa shaqada ee fadiidka ah

“

Sannadihii u danbeeyay, Soomaaliya waxa ay ka soo kabanaysay burburkii dhaqaale ee ku dhacay, iyada oo dhaqaalaheedu kor u soo kacay 2.9 ilaa 3.2 boqolkiiba.²⁴ Balse tani waxba kamay tarin kor u qaadista shaqo abuurka dhallinyarada. Sannadihii 2020 iyo 2021-kii, Soomaaliya waxa ku kulmay afar masiibo: abaar, fatahaado, xaalufin ayax iyo cudurka Karoonaha.²⁵ Natiijooyinkii ka dhashay xannibaadaha Karoonaha waxa ka mid ah xayiraadaha isu socodka, xannibaadaha jarjanjarada dalabka maciishadda, taas oo keentay in boqolkiiba 0.4 uu hoos u dhaco wax-soosaarka dalka gudihiisu sannadkii 2021-kii, halka uu sannadkii 2020-kii hoos u dhigay boqolkiiba 1.5.²⁶

Adeegyada iyo beeraha ayaa saamaynta ugu wayn wali ku leh dhaqaalah Soomaaliya.²⁷ Dhismayaasha, xawilaadaha lacagaha iyo maalgashiga isgaarsiinta, ayaa iyaguna qayb libaax ka ka qaata koboca dhaqaalah.²⁸ Waayadii hore,beeruhu waxa ay ahaan jireen ilaha ugu waawayn ee shaqada, balse waayadan danbe waxa ku yimid hoos u dhac ay sababeen xasilooni darrada dabatheeratay ee ka jirta deegaannadii beeraha, waddo xumada iyo in ay yihiin kuwo aad ugu nugul abaarah iyo fatahaadaha. Sida lagu sheegay daraasad uu dhawaan Bangiga Adduunku ka sameeyay xaaladaha dhaqaale ee dalka, waaxda adeegyada bulshada iyo hawlah la xiriira ayaa koobsada saammiga ugu wayn ee shaqoooyinka dalka, waxaana xoogga shaqaale ee firfircoo ka hawlgala boqolkiiba 76.²⁹ Noocyada kala duwan ee ganacsiga ayaa inta badan mas'uul ka ah hawlaho noocan ah. Ganacsiga xuduudaha, gaar ahaan xadka dhaw ee Itoobiya, ayaa ah isha ugu wayn ee shaqo. Xirfadaha wax-soosaarka ayaa lagu qiyasaa boqollay aad u yar marka loo eego wadarta guud ee goobaha shaqada, intooda badanina waa warshadaha cuntada soo saara. Beeraha, xoolaha, iyo kalluumaysiga ayaa boqolkiiba 26 ka ah wadarta guud ee shaqoooyinka.³⁰ Waaxda dadweynaha aya shaqaalaysiisa qiyastii boqolkiiba 5 ka mid ah shaqaalah xoogsatada ah.³¹ Daraasad kale oo uu sameeyay Bangiga Adduunku, ayaa lagu ogaaday inay in ka badan saddex-meelood labo ka mid ah shaqaalah firfircoo ay yihiin kuwo iskood u shaqaysta, sababta oo ah ma jiraan fursado shaqo oo rasmi ahi.³² Dhallinyarada Soomaaliya, boqolkiiba 39 ayaa ka hawlgala suuqa shaqada ee firfircoo.³³

24. World Bank. 2020. Somalia Economic Update, Fifth Edition: Impact of COVID-19: Policies to Manage the Crisis and Strengthen Economic Recovery. <https://openknowledge.worldbank.org/bitstream/handle/10986/34239/Somalia-Economic-Update-Impact-of-COVID-19-Policies-to-Manage-the-Crisis-and-Strengthen-Economic-Recovery.pdf?sequence=6&isAllowed=true>

25. Ibid.

26. World Bank, Somalia Economic Update, Sixth Edition: Investing in Health to Anchor Growth, 2021. Available at: <https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/Somalia-Economic-Update-Investing-in-Health-to-Anchor-Growth.pdf>

27. Heritage Institute for Policy Studies and City University of Mogadishu 2020. Somalia's Agriculture and Livestock Sector: A Baseline Study and Human Capital Development Strategy. <http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2020/08/Agriculture-HCDM-REPORT.pdf>

28. National Economic Council, 2019. Somalia Vision for Private Sector Development Report. Working Paper. Available at: <https://nec.gov.so/wp-content/uploads/2021/11/Somalia-Vision-for-Private-Sector-Development.pdf>

29. World Bank, Somalia Country Economic Memorandum: Towards an Inclusive Jobs Agenda, 2021. Available at: <https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/35943>

30. Ibid, pg 59.

31. Ibid.

32. Karamba, Wendy. 2021. Improving Access to Jobs for the Poor and Vulnerable in Somalia. World Bank, Washington, DC. Page 27. Available at: <https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/34983>

33. Ibid

“
*inkasta oo
ay xarumaha
waxbarashada
fadihiidka ahi
soo saaraan
qalinjabiyeaal
cusub, haddana
intooda badani
waa kuwo aan
diyaarsanayn
ama aan u
galabaysnayn
in ay iskood u
shaqaystaan*

Nidaamka waxbarashada Soomaaliya ayaa inta badan sabab u ah shaqo la'aanta haysata dhallinyarada dalka. Waxaa loo qorsheeyay in dadka la baro xirfad ay xafiis uun kaga shaqeeyaan , iyada oo muhiimadda ugu yar la siinayo xirfadaha farsamada gacanta iyo hal-abuurka shaqada. Xaalku sidaas buu ahaa tan iyo burburkii dawladdii dhexe 1991-kii, ilaa haddana waa tabtii. Daraasad ay dhawaan wada sameeyeen Machadka Heritage iyo Jaamacadda City ee Muqdisho, oo qayb ka ahayd mashruucii horumarinta cududda bulshada, ayaa lagu ogaaday in ay isqardhaafsan yihiin—noocyada xirfadeed ee ay doonayaan waaxaha wax-soosaarka dhaqaalaha iyo xirfadaha ay soo bartaan ardayda Soomaaliyeed ee soo qalinjabisay- taasina waa caqabadda ugu wayn ee sababtay shaqo la'aanta dhallinyarada.³⁴

Caqabaddan natijadeedu waa in ay Soomaaliya qiimaha ugu sarreeya siisay waxbarashada tooska ah, halka ay dayacday waxbarashadii farsamada gacanta iyo xirfadaha. Sidaas darteed, inkasta oo ay xarumaha waxbarashada fadiiidka ahi soo saaraan qalinjabiyeaal cusub, haddana intooda badani waa kuwo aan diyaarsanayn ama aan u qalabaysnayn in ay iskood u shaqaystaan. Nidaamka waxbarashada Soomaaliya, gaar ahaan tan heerka jaamacadeed, waxa ay soo saartaa qalinjabiyeaal soo bartay cilmiga bulshada, kuwaas oo ka tira badan xaddiga shaqaale ee suuqu uga baahan yahay xirfadaha noocaas ah.³⁵ Sidaa darteed, qalinjabiyeayaasha ka soo baxa kulliyadaha wax-soosaarka dhaqaale ee dalku waa kuwo aad uga hooseeya xaddiga shaqaale ee suuqaasi u baahan yahay. Mid ka mid ah sababaha macquulka ah ee jaahwareerkan dhaliyay ayaa ah in dhallinyarada Soomaaliyeed aragti qaldan ka haystaan beeraha,xoolaha, kalluumaysiga iyo waaxaha kale ee wax-soosaarka.³⁶ Waxbarashada dalka lagu dhigtaa waxa ay si joogto ah ugu guuldarraysatay in ay soo saarto dhallinyaro si waafi ah u diyaarsan, kuwaas oo leh xirfado aqooneed oo ka caawinaya in ay helaan shaqooyin dheef leh.

Halkani waa meesha u baahan in ay dawladdu ka samayso falcelin wax ku ool ah,waxaanay tilmaamaysaa baahida loo qabo falcelin dawladeed oo dhammaystiran, si loo horumariyo xarumaha waxbarashada ee dawliga ah, iyo kuwa waxbarashada gaarka loo leeyahay ee xargaha goostay, iyada oo la samaynayo shahaadooyin midaysan, oo si firfircoor kor ugu qaadaya xirfadaha muhiimka u ah suuqa shaqada, waana in ay rag iyo dumarba awood u siinayso in ay shaqaystaan, iyada oo aan loo eegaynin in ay dugsiga ku jiraan iyo in ay ka baxeen.

34. Somalia's education sector: Fostering skills through a demand-driven education system (2020). Available at: <https://heritageinstitute.org/somalias-education-sectorfostering-skills-through-a-demand-driven-education-system/>

35. Ibid.

36. Heritage Institute for Policy Studies and City University of Mogadishu 2020. Human Capital Development Strategy for Somalia. Available at: <http://www.humancapital.so/wp-content/uploads/2020/11/Strategy-English-Nov-4-.pdf>

Maamul xumada joogtada ah ayaa caqabad kale oo wayn ku ah suuqa shaqada ee dhallinyarada Soomaaliyeed. Xaaladda dhaqan-dhaqaale ee dalka oo haatan quus taagan ayaa loo aanaynayaa musuqmaasuqa ay wadaan siyaasiyiinta iyo masuuliyiinta dawladdu. Warbixin uu soo saaray Machadka Heritage oo ku saabsan dawlad wanaagga ayaa lagu sheegay in maamul-xumadu udub-dhexaad u tahay fashilka ku yimid abuuritaanka horumar dhaqaale oo la taaban karo, maadaama dalku leeyahay khayraad aad u badan. Taas macnaheedu waxa weeye in siyaasiyiin aan dareen ummadeed lahayn oo dantood u shaqaystayaal ahi, ay gabi ahaanba ku guuldarraysteen buuxinta mabaadiidii dawladnimo ee suubbanayd, taasina waxa ay curyaamisay soo kabashada awoodda dhaqaale ee Soomaaliya iyo in ay dadkeeda u abuurto shaqo hufan.³⁷ Caqabaha ka dhashay musuqmaasuqa ay ku kacaan hormuudka siyaasaddu ayaa si wayn u sameeyay dhallinyarada soo qalinjabisay. Daraasad dhawaan laga sameeyay Soomaaliya ayaa lagu ogaaday in musuqmaasuqa baahsan iyo ku takri falka khayraadka dalku ay saamayn wayn ku yeeshen in dhallinyarada soo qalinjabisay waayaan shaqooyin faa'iido leh.³⁸

2.4 Shaqo la'aanta dhallinyarada iyo amni darrada

Marka loo eego daraasadaha sugaran iyo aragtiyaha ku salaysan colaadaha, saboolnimada iyo shaqo la'aanta ayaa in badan loo arkaa in ay yihiin waxyaabaha ugu waawayn ee keena colaadaha. Aragtidan ayaa dabayaaqadii 1990-naadkii noqotay mid cusub oo hanatay dhegaha dadwaynaha, waxaana bogaadinteeda leh Paul Collier oo ay qayb ka ahayd tijaabo daraasadeed oo uu ka sameeyay wajiyada kala duwan ee dhaqaaluhu ku leeyahay colaadaha. Aragtidan ayaa ku doodaysa in xiriir toos ah, oo ixtimaalkiisu aad u heer sarreeyaa ka dhaxeeyo shaqo la'aanta dhallinyarada iyo rabshadaha colaadaha wata.



*Shaqo la'aantu
waxa ay sii hurisaa
kacdoonnada,
waxaanay
dhallinyarada ku
dhiirrigalisaa in ay
ku biiraan kooxaha
rabshadaha
wada, iyada oo u
horseedda xag-
jirnimo, taasina
waa sababta
keenta rabshadaha
iyo amni-darrada*

Dooddan ayaa xiriir toos ah, oo ixtimaalkeedu aad u sarreeyoo ka dhaxaysiinaysa bulshada ay ku badan yihiin ragga dhallinyaarada ah ee aan haysan fursado shaqo oo dakhligoodu fiican yahay iyo rabshadaha dagaallada wata , gaar ahaan meelaha ay ka jiraan xaalado nabagdalyo oo liitaa. Collier, dooddiiisu waxa ay hoosta ka xarriiqaysaa in shaqo la'aantu tahay isha cuqdadda iyo rabshadaha- iyada oo dhallinyarada bilaa shaqada ah ku riixda in ay ka qaybqaataan rabshadaha iyo in ay ku biiraan kooxaha hubaysan.³⁹ Shaqo la'aantu waxa ay sii hurisaa kacdoonnada, waxaanay dhallinyarada ku dhiirrigalisaa in ay ku biiraan kooxaha rabshadaha wada, iyada oo u horseedda xag-jirnimo, taasina waa sababta keenta rabshadaha iyo amni-darrada.

37. Heritage Institute for Policy Studies, 2021. Impediments to Good Governance in Somalia. <https://heritageinstitute.org/impediments-to-good-governance-in-somalia/>

38. Gelle, L. Y., Abshir, A., & Ali-Salad, M. A. (2021). Graduate Unemployment in Somalia: Causes, Socio-Economic Consequences and Possible Solutions. *Journal of Economics*, 9(3), 14-21.

39. P. Collier, Doing well out of war: An economic perspective, in M. Berdal and D. Malone (eds.), *Greed and Grievance: Economic Agendas in Civil Wars* (Boulder: Lynne Rienner, 2000). Available at: <http://citeseerx.ist.psu.edu/viewdoc/download?doi=10.1.1.475.2663&rep=rep1&type=pdf/>

Marka si heer calami ah loo eego, daraasad dhawaan la sameeyayay ayaa muujinaysa in ay kooxaha rabshadaha wadaa qortaan dhallinyarada bilaa sumcadda ah. Kororka dhallinyarada ee xawliga ku socda, gaar ahaan qaybo ka mid ah Aasiya, Bariga Dhexe iyo Afrika, iyo sida oo kale suuqyada shaqo ee aan lahayn awood ay ku hantaan, ayaa kooxaha rabshadaha wada fursad u siiya in ay dhalliyaradaas shaqaalaysiiyaan.

Hay'adaha horumarinta ee caalamiga ah, ayaa in badan ka hadlay arrimahan. Tusaale ahaan, warbixin cilmiyaysan oo ay soo saartay Hay'adda Horumarinta Caalamiga ah ee Maraykanka (USAID) oo ku saabsan dhallinyarada iyo colaadaha, ayaa sheegtay in shaqo la'aantu tahay khatar jirta oo dhallinyarada ku riixaysa in ay ku biiraan kooxaha rabshadaha wada, kuwaas oo bixiya faa'iidooyin dhaqaale oo degdeg ah, sida oo kale na waxa ay si dadban ugu helaan lacago dhac.⁴⁰

Intaa waxaa dheer, qiimayn uu Bangiga Adduunku ka sameeyay ISIS ayaa shaaca ka qaadday in askarta ay shaqaalaysiiyaan ay yihiin dhallinyaro markaas uun dhammaysatay hugsiga sare, badankooduna ay waayeen fursado shaqo. Shaqo la'aanta haysata dhallinyarada ayaa markasta ku abuurta cabashooyin iyo niyadjab, taas oo ugu danbayn ku kallifta in ay fal-danbiyeedyo ku kacaan.⁴¹

“

*Marka laga
yimaaddo
shaqo la'aanta
guud, takoorka
dhaqaale- oo ay
horseed u yihiin
musuqmaasuqa
iyo qaraabokiilku
- ayaa saamaynta
ugu badan ku leh
in dhallinyaradu ku
biiraan kooxaha
rabshadaha wada*

Marka laga yimaaddo shaqo la'aanta guud, takoorka dhaqaale- oo ay horseed u yihiin musuqmaasuqa iyo qaraabokiilku - ayaa saamaynta ugu badan ku leh in dhallinyaradu ku biiraan kooxaha rabshadaha wada. Rabshadaha badankooda waxa sabab u noqon kara maamul-xumo dhaqaale oo horseedda cabashooyin ka dhan ah dawladaha iyo hay'adaha kale ee bulshada.⁴² Inkasta oo laga yaabo in aanay cabashooyinka badan iyo cadhooyinku si toos ah u horseedin xagjirnimo rabshad dhalisa, haddana waxa hubaal ah in ay kor u qaadi karaan khatarta kacdoonno rabshado wata. Haddii aan wax laga qaban arrimaha keenaya niyad jabka wayn, dhacdooyinka isdaba-joogga ah ee bulshada kicinaya waxa ay abuuri karaan xaalad colaadeed, oo khatar ku ah amniga iyo xasiloonida dalka.⁴³ Tusaale ahaan, kacdoonnadii Guga Carabta ee 2011-kii waxa bilaabay dhallinyaro niyad jabsan oo muujinaysa cabashooyinka siyaasadeed, isla markaana dhigaya mudaharaaddo lagaga soo horjeedo la'aanta fursado dhaqaale.⁴⁴ Sidaa si la mid ah, Boko Haram oo ka mid ah ururraa argagixisada ee rabshadaha ka wada adduunka, ayaa la aasaasay 2002-dii, iyada oo falcelin u ahayd dibudhaca dhaqaale iyo ka bulsho ee ka jira gobolka waqooyi-bari ee Nijeeriya, iyo sida oo kale nacaybka ka jira gudaha dalkooda ee la xiriira musuqmaasuqa dawladda. Kooxaha xagirkka ah ayaa inta badan ka faa'iidaysta dhallinyarada ciillan, iyaga oo siiya fursad ay ku caro burburaan.⁴⁵

40. USAID (US Agency for International Development), Youth & conflict: A toolkit for prevention, Washington, DC: USAID (2005). Available at: https://pdf.usaid.gov/pdf_docs/Pnadb336.pdf

41. See World Bank report. Unemployment and violent extremism evidence from Daesh foreign recruits (2018). Accessed at: <https://openknowledge.worldbank.org/bitstream/handle/10986/29561/WPS8381.pdf?sequence=5/>

42. International Peace Academy Policy Report, 2003. Beyond Greed and Grievance: Policy lessons from Studies in the Political Economy of Armed Conflict. Available at: https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/6765C3D3477FE91C8525742400689BD7-IPA_ArmedConflict_Oct03.pdf

43. Adesoji Adelaja and Justin George, Is youth unemployment related to domestic terrorism? (2020). Accessed at: <https://www.jstor.org/stable/pdf/26940038.pdf>

44. Mulderig, M. C. (2013). An uncertain future: Youth frustration and the Arab Spring. Accessed at: <https://www.bu.edu/pardee/files/2013/04/Pardee-Paper-16.pdf>

45. Ibid.

“

Way xaddidan yihiin miisaaniyadda iyo siyaasadaha ay dawladdu ku siin karto dhallinyarada fursado shaqo oo wax ku ool u ah, taasina waxa ay dhallinyarada ku kallifaysaa in ay nolosha ka raadsadaan ilo kale oo nololeed

Xaqiiqooyinkan oo dhammi waxa ay qirayaan in ururrada xagjirka ahi ka faa'iidaystaan arrimaha ku salaysan kala takoor dhaqaale iyo kala xigtaysiga bulsho ee qabiilaysan,kuwaas oo caqabad wayn ku ah in la helo koboc iyo korriin dhaqaale oo joogto ah iyo shaqo abuurka.

Sidaa darteed, arrimaha la xiriira dhaqaalaha ayaa loo aqoonsaday in ay ka mid yihiin dhibaatooyinka badan ee qofka ku xanbaara in uu ku biiro kooxaha rabshadaha wada. Xaaladda guud ee horumar la'aanta Soomaaliya waxa ay si toos ah ugu xiran tahay waxyaabaha u muuqda in ay kor u qaadaan awoodda al-Shabaab. Adeegyada dadwaynaha, sida shaqaalaysiinta iyo barnaamijyada kale ee ilaalinta adeegyada bulshada, ayaa ah kuwo xaddidan ama aan ka jirin dalka oo dhan. Way xaddidan yihiin miisaaniyadda iyo siyaasadaha ay dawladdu ku siin karto dhallinyarada fursado shaqo oo wax ku ool u ah, taasina waxa ay dhallinyarada⁴⁶ ku kallifaysaa in ay nolosha ka raadsadaan ilo kale oo nololeed.

Daraasadda laga sameeyay dalka Najeeriya ayaa shaaca ka qaadday in “shaqo la'aanta dhallinyarada iyo maqnaanta awood dowlaadeed oo kala xakamaysa dadka, ay sababeen danbiyada faraha badan ee ay ku kacaan dhallinyaradu.”⁴⁷ Daraasaddan ayaa soo xiganaysa aragtida Maxamed oo sheegaysa in xaaladaha dhaqaale-xumo ee ka dhasha saboolnimada, shaqo la'aanta dhallinyarada, iyo sinnaan la'aanta bulshadu ay sababaan danbiyada, iyaga oo dhibaatooyinkaasi is hortaaga in waalidiintu iskuuladda u diraan carruurtooda, taasina waxa ay carruurta u horseeddaa in iyaga oo aan qaangaarin ay noqdaan jirri u fekera sida danbiileyaasha.⁴⁸ Inkasta oo uu ra'yiga Maxamed sax noqon karo, haddana in danbiyada lagu eeddeeyo shaqo la'aanta dhallinyarada ayaa ah arrin muran badani ka taagan yahay, oo ay isku khilaafeen aqoonyahan badani. Tusaale ahaan, daraasaado tiro badan oo ay samaysay hay'adda Mercy Corps sannadkii 2013-kii may helin wax xiriir ah oo ka dhexeeya nooca shaqada iyo taageerada ama rabitaanka ka qaybgalka- rabshado siyaasadeed.⁴⁹ Daraasad kale oo ay samaysay Mercy Corps 2015-kii ayaa ka soo horjeedda doodda ah “shaqo la'aantu waxa ay dhallinyarada u nuglaysaa in ay xaaladdooda dhaqaale uga faa'iidaystaan oo ay qortaan kooxaha kacdoonnada wada iyo argagixisadu.”⁵⁰ Sahanka hay'adda Mercy Corps oo laga sameeyay Puntland iyo Somaliland, ayaa meesha ka saaraya aragtida inteeda badan ka jirta koofurta Soomaaliya, oo ah goob colaado iyo dagaallo ay ka socdaan.

46. World Bank, Somalia Country Economic Memorandum: Towards an Inclusive Jobs Agenda, 2021. Available at: <https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/35943>

47. Janet Monisola Oluwaaley, Youth unemployment, rising criminality and the challenge of sustainable security in Nigeria's South West region, International Journal of Social Science Perspectives 8, no. 1 (2021), 31-40.

48. Ibid.

49. Mercy Corps, Examining the links between youth economic opportunity, civic engagement and conflict: Evidence from Mercy Corps' Somali Youth Leaders Initiative (2013).

50. Ibid.

Intaa waxaa dheer, cilmibaaris kale oo ay hay'adda Mercy Corps ka samaysay dalka Afgaanistaan, ayaa lagu ogaaday in "aanay kordhinta shaqada iyo dakhligu isbeddel la taaban karo u horseedin dhallinyarada taageerta kooxaha mucaaradka ee hubaysan."⁵¹ Isla xilligaa, sahan ay samaysay ILO ayaa lagu ogaaday, in aanay shaqadu xiriir toosa la lahayn nabadaynta, hayeeshee hoos u dhigto taageerada kooxaha rabshad wadayaasha ah oo ka faa'iidaysta dhallinyarada Soomaaliyed, iyada oo boqolkiiba 6 keentay, halkii ay ka ahayd boqolkiiba 16.⁵² Daraasaddan ayaa tilmaantay in rabshado koobani dhacayaan haddii dhallinyaro badani shaqo helaan.

Guud ahaan, kooxaha rabshadaha wada, siyaasiyiinta iyo ganacsatada tartanka ku jirta ayaa ka faa'iidaysta xaaladaha dhaqaale ee haysta dhallinyarada, waxaana laga qaybgaliyaa rabshadaha. Tusaale ahaan, daraasad laga sameeyay dalka Kenya oo ku saabsan aragtida bulshadu ka haysato xagjirnimada ayaa lagu ogaaday in habka ugu horreyya ee ay al-Shabaab u adeegsato qorashada dhallinyarada ay tahay lacago caddaan ah oo ay siiyaan dhallinyarada, iyaga oo si toos ah u abbaara dhallinyarada bilaa shaqada ah iyo kuwa danbiyo hore ka soo galay.⁵³ Intaa waxaa raaca, daraasado laga sameeyay bulshada oo ka hadlaya hababka ay wax ku shaqaalaysiistaan Boko Haram, ayaa tilmaamaya in shaqo la'aantu tahay arrinta ugu wayn ee ay uga faa'iidaystaan in dadku kooxdooda ku soo biiraan. Daraasadahan ayaa muujinaya in ay kooxaha kacdoonka wadaa si fudud u kхиyaameeyaan in badan oo ka mid ah dhallinyarada bilaa shaqada ah, iyaga oo uga faa'iidaysanaya xaalandahooda dhaqaale, kuwaas oo dhallinyarada u horseedda xag-jirnimada.

Daraasad 2019-kii ay samaysay ILO ayaa sawir cad ka bixisay xiriirka ka dhaxeeya xaddiga shaqo la'aanta iyo tirada dadka ee lagu dilay Soomaaliya oo ay colaado aafeeyeen.⁵⁴ Tani waxa ay xoojinaysaa aragtida ah in shaqo la'aanta iyo maqnaanta shaqo wanaagsani ay dhaliyaan" colaado isdabajoog ah oo arxan daran". Taas dhiggeeda, waxa daraasad lagu ogaaday in xaddiga dhimashadu ku sarreeyo gobollada Soomaaliya ee ay shaqo la'aanta baahsani ka jирто, taasina waxa ay caddaynaysaa in shaqo la'aanta iyo xaalandaha shaqo xumadu sabab u noqon karaan colaadaha.⁵⁵ Waxa kale oo la ogaaday in xiriir ka dhexeyyo "badashada kooxaha hubaysan, gaar ahaan al-Shabaab iyo abaaraha ba'an ee Soomaaliya ka jira". Kacdoonnadu waxa ay ku guulaysteen in ay soo jiitaan dhallinyaro Soomaaliyed oo ay halakeeyeen cunto yaraan, ka dhalatay macaluul soo noqnoqotay iyo shaqo la'aan joogto ah.

51. Ibid.

52. Floriana Borino and Catherine Saget, Employment programs and conflict in Somalia, ILO, Research department, Working paper, No. 51 (2019).

53. Valeria Izzi, Promoting decent employment for African youth as a peace building strategy (2020), 17.

54. Borino, F., & Saget, C. (2019). Employment programs and conflict in Somalia. International Labour Office. https://www.ilo.org/wcmsp5/groups/public/---ed_emp/documents/publication/wcms_790122.pdf

55. Ibid.

Marka la soo koobo, caddaymaha laga helay dibu-eegista daraasadaha ayaa muujinaya in fursad la'aanta dhaqaale ee ka dhalatay caqabadaha dhaqan-dhaqaale iyo kuwa maamul ay dhallinyarada gayasiyeeen kor u kaca khatarta colaadaha ee gacan ka hadalka ah – sababta oo ah dhallinyaradu waxa ay ku niyad jabeen shaqo la'aanta haysata iyo waayitaanka fursado waxbarasho. Arrintan, ayaa dhallinyarada ku keentay kala qaybsanaan iyo nuglaansho ku xanbaaray in ay noqdaan meel ay ku tarmaan kooxaha rabshadaha wadaa, ha noqdeen kooxaha xagjirka ah ama fallaagada siyaasadeed, kuwaas oo dhallinyarada ku soo dabaya dakhli naftooda halligaya. Qaybaha soo socda ayaa daahfuraya tijaabooyin cadcad oo lagu sahaminayo aragtida qofeed ee dhallinyarada Soomaaliyeed, si loo iftiimyo waxyaabaha ka qaybqaata xaddiga shaqo la'aanta baahsan ee dhallinyarada iyo khataraha amni ee ka dhalan kara maqnaanta fursadaha shaqo iyo ku dhaqanka qaraabokiilka.


3. Nadiijada Daraasadda iyo Falanqaynta

3.1 Xogta ka qaybgalayaasha daraasadda

“

Xog ururin aasaasi
ah ayaa la soo
ururiyay iyada
oo waydiimo
loo qaybiyay
dhallinyaro ku
nool Muqdisho,
Kismaayo,
Baydhabo,
Baledweyn,
Gaalkacayo,
Garoowe iyo
Boosaaso

Ka qaybgalayaasha daraasaddu waxa ay ahaayeen dhallinyaro da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 34 sano. Xog ururin aasaasi ah ayaa la soo ururiyay iyada oo waydiimo loo qaybiyay dhallinyaro ku nool Muqdisho, Kismaayo, Baydhabo, Baledweyn, Gaalkacayo, Garoowe iyo Boosaaso. Sida ka muuqata shaxanka 1-aad, dadkii jawaabay boqolkiiiba 51 ayey da'doodu u dhaxaysay 25-29 jir, halka ay boqolkiiiba 26 ka ahaayeen da'da u dhaxaysa 20-24. Ka qaybgalayaasha ugu tirada yar oo ah boqolkiiiba 11 ayey da'doodu u dhaxaysay 30-34 sano.



Dadka jawaabay boqolkiiba 67 waxa ay ahaayeen rag, halka ay boqolkiiba 33 ka ahaayeen dumar. Sababta keentay in tiro yar oo haween ahi ka qaybgalaan daraasaddan ayaa ugu horrayn loo nisbaynayaa sahankan oo lagu sameeyay goobaha bulshada sida goobaha qaxwaha, maqaaxiyaha shaaha, huteellada cuntada iyo garoonnada ciyaaraha. Tirada haweenka Soomaaliyeed ee ku sugar goobaha guud ayaa weli xaddidan, taasna waxa loo aanaynayaa caadooyinka dhaqan-bulsheed. Miimadda ugu wayni waa in aanu haweenka da'da yar dookhoodu ahayn in ay ka bulsheeyaan goobaha lagu kulmo. Si kastaba ha ahaatee, arrintan waxa jaangooya caado dhaqameedka bulshada iyo u hoggaansanaanta doorarka jinsiga ee soo jireenka ah sida in haweenku hawlaha guriga ku koobnaadaan.

“


*Jaantuska
3-aad waxa
uu muujinayaa
heerarka
waxbarashada,
waxaanay jawaab
celiyayaasha
badankoodu
haysteen
shahaadada
koowaad ee
jaamacadda,
oo ay ku xigaan
kuwa dhigtag
waxbarashada
aasaasiga ah
(hoose,dhexe
iyo sare) oo ah
boqolkiiba 32.3
iyo kuwa haysta
shahaadada
labaad ee
jaamacadda oo ah
boqolkiiba 6.6*

Jaantuska 3-aad waxa uu muujinayaa heirarka waxbarashada, waxaanay jawaab celiyayaasha badankoodu haysteen shahaadada koowaad ee jaamacadda, oo ay ku xigaan kuwa dhigtag waxbarashada aasaasiga ah (hoose,dhexe iyo sare) oo ah boqolkiiba 32.3 iyo kuwa haysta shahaadada labaad ee jaamacadda oo ah boqolkiiba 6.6. Boqolkiiba 6 kaliya ayaan waxbarasho toos ah soo marin. Arrintan waxa loo aanayn karaa in daraasaddan laga sameeyay magaaloooyinka waawayn ee haysta fursadaha waxbarasho marka loo eego meelaha miyiga ah. Tani waxa ay u markhaati furaysaa natijjooyinkii lagu xusay daraasadidhii hore oo muujinayay in farqi wayni u dhexeeyo miyiga iyo magaalada, marka loo eego helitaanka waxbarashada aasaasiga ah iyo tacliinta sare. Si kastaba ha ahaatee, waxa iswaydiin mudan tayada waxbarashada Soomaaliya? Tusaale ahaan, qimayn ay Waaxda Qorshaynta iyo Istiraatijiyyadaha Waxbarashadu samaysay 2017-kii waxa lagu sheegay in farqi wayni u dhexeeyo helitaanka waxbarashada aasaasiga ah ee meelaha miyiga ah iyo magaaloooyinka, iyada oo ardayda boqolkiiba 75 iska diiwaan galiiyen dugsiyada magaalada, halka boqolkiiba 25 iska diiwaangaliyeen dugsiyada miyiga.⁵⁶ Dhanka tacliinta sare, sahan ay Hay'adda Iftin Foundation ka samaysay ardaydii qalinjabisay sannadkii 2020-kii waxa lagu sheegay in ilaa 17,548 arday ka qalinjabiiyen 52 jaamacadood oo ku kala yaalla Muqdisho, Puntland, Galmudug, Hirshabeele iyo Jubaland.⁵⁷ Ardayda xad dhaafka ah ee soo qalinjabinaysa ayaa qayb wayn ka ah cadaadiska suuqa shaqada ee fadhiidka ah iyo faro badnaanta qalinjabiyeyaasha bilaa shaqada ah.

56. 2017 Ministry of Education, Culture and Higher Education (MOECHE). Education Sector Strategic Plan. Available at: https://www.globalpartnership.org/sites/default/files/federal_government_of_somalia_essp.pdf

57. Iftin Foundation Report, 2020. Country Graduate Survey for Somalia. Accessed at: <http://iftinfoundation.org/wp-content/uploads/2021/08/Country-Graduation-Survey-of-2020.pdf>

Jaantuska 3-aad: Waxbarashada



3.2 Heerka shaqo la'aanta dhallinyarada


“

Marka loo eego natijada daraasaddan, aad buu u sarreeyaa heerka shaqo la'aanta dhallinyaradu, waxaanu muujinayaa walwal aad u badan. Xogta daraasaddu waxa ay ina tusaysaa in dhallinyaradii la sahamiyay boqolkiiba 69.4 ay ahaayeen bilaa shaqo marka lala barbar dhigo kuwa shaqeeya (Jaantuska 4-aad). Inkasta oo Soomaalida lagu majeerto dad ganacsiga ku fiican, haddana boqolkiiba 8.7 kaliya ayaa ku hawlan arrimaha ganacsiga. In ka badan saddex-meelood laba meelood ayaa dhallinyarada la soo xushay bilaa shaqo ahaa, taas oo muujinaysa in fursadaha shaqo ee xaddidan lagu tilmaami karo arrin khatar ku ah dhallinyarada Soomaaliyeed, una nuglaynaysa in ay ku biiraan kooxaha dagaal oogeyaasha ah, gaar ahaan, kuwa xagjirka ah.

Natijoooyinkan ayaa sida oo kale taageeraya natijoooyinka warbixintii UNDP ee soo baxday 2012-kii, taas oo sheegaysay in dhallinyarada Soomaaliyeed boqolkiiba 67 bilaa shaqo yihiin iyo in ay shaqo la'aanta ugu wacan tahay dalka oo aan awood u lahayn in uu shaqo abuur faa'iido leh u sameeyo dhallinyaradiisa tiro ahaan iyo tacliin ahaan ba u sii badanaysa.⁵⁸ Intaa waxaa dheer, qiimayn uu Ururka Socdaalka Adduunku (IOM) ka sameeyay shaqo la'aanta dhallinyarada Soomaaliya ayaa lagu qiyasay in boqolkiiba 80 dhallinyarada Soomaaliyeed ay yihiin bilaa shaqo. Tani waxa ay muujinaysaa inta ay leegtahay baaxadda shaqo la'aanta dhallinyarada Soomaaliyeed.

58. UNDP Somalia, Human Development Report, 2012. Available at. https://hdr.undp.org/sites/default/files/reports/242/somalia_report_2012.pdf

Jaantuska 4-aad: Heerka Shaqada



fursadaha shaqo ee waaxda martigalinta, gaar ahaan hudheellada iyo makhaayadaha, ayaa sii kordhaysa, balse dhallinyaro badan ayaa ka cagojiidaya in ay ka shaqeeyayaan goobahaas. Tani waxa ay keentay in loo-shaqeeyayaashu shaqaale u doontaan dalalka dariska

Mid ka mid ah caqabadaha ugu qotada dheeri ma aha oo kaliya fursado la'aanta shaqo balse waa aragtida qalloocan ee dhallinyaradu ka qabaan shaqooyinka qaarkood oo u noqon lahaa ilo shaqo. Daraasad ay dhawaan sameeyeen Machadka Heritage (HIPS) iyo Jaamacadda City ee Muqdisho oo ku saabsanayd shaqada wax soo saarka leh ayaa lagu ogaaday in dhallinyarada intooda badani fikrado xun ka haystaan qaar ka mida xirfadaha farsamada gacanta, taasina waxa ay qayb ka tahay waayitaanka shaqo dheef leh.⁵⁹ Tusaale ahaan, fursadaha shaqo ee waaxda martigalinta, gaar ahaan hudheellada iyo makhaayadaha, ayaa sii kordhaysa, balse dhallinyaro badan ayaa ka cagojiidaya in ay ka shaqeeyayaan goobahaas. Tani waxa ay keentay in loo-shaqeeyayaashu shaqaale u doontaan dalalka dariska.

Magaalooyinkii daraasadda laga sameeyay waa ay ku kala duwanaayeen shaqo la'aanta dhallinyarada. Xogta sahankani waxa ay xaqiijinaysaa in kuwa ugu badan oo ah dhallinyarada Muqdisho ay boqolkiiba 41 yihiin bilaa shaqo. Baladwayn iyo Baydhaba heerka shaqo la'aanta dhallinyaradu waa boqolkiiba 11. Boosaaso iyo Garowe heerka shaqo la'aanta dhallinyaradu waa boqolkiiba 10, halka uu Kismaayo iyo Gaalkacayo ka yahay boqolkiiba 9 iyo boqolkiiba 8 sida ay u kala horreeyaan. Xaddiga sare ee Shaqo la'aanta dhallinyarada Muqdisho ayaa loo aanaynayaa in ay keentay dhallinyarada ku nool magaaladaas oo ka badan kuwa ku nool magaaloooyinka kale. Marka la bardhigo, daraasad ay samaysay Hay'adda Socdaalka Adduunku (IOM) sannadkii 2016-kii ayaa sawir kan mid ka duwan ka bixisay shaqo la'aanta dhallinyarada saddex magaalo oo Soomaaliya ka mid ah. Daraasaddaas ayaa lagu sheegay in dhallinyarada bilaa shaqada ah ee Baydhabo ka sarreysso (24%) marka loo eego Kismaayo oo ah (13%) iyo Muqdisho oo ah (6%).⁶⁰

59. Productive labor and employment creation for Somalia: Key challenges and opportunities (2020). Accessed at: <http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2020/08/Labor-HCDM-REPORT-1.pdf>.

60. IOM youth employment and migration (2016), 43. Accessed at: <https://www.iom.int/sites/g/files/tmzbdl486/files/country/docs/IOM-Youth-Employment-Migration-9Feb2016.pdf>.

Shaxanka 3-aad, Magaalo kasta iyo Heerka Shaqo la'aanta Dhallinyaradeeda

Magaalada	Meelaha ay kala joogaan ka qaybgalayaashu(Dhallinyarada)	Tirada dhallinyarada aan shaqaynii	Boqollayda dhallinyarada bilaa shaqada ah iyo magaaloooyinkooda	Boqolladayda wadarta bilaa shaqada ah
Baydhabo	101	75	74%	11%
Beledwayne	100	79	79%	11%
Boosaaso	97	66	68%	10%
Gaalkacayo	97	56	58%	8%
Garoowe	103	66	64%	10%
Kismaayo	101	65	64%	9%
Muqdisho	391	279	71%	41%
Wadarta	990	686	69%	100%

“

Marka la dajinayo qorshayaasha kala mudnaanshaha shaqooyinka, waxa loo baahan yahay in tixgalin gaar ah la siiyo noocyada shaqo ee ku habboon wax ka qabashada dhallinyaro kasta baahidooda shaqo la'aaneed. Qaybo badan oo ka mid ah farqiga u dhaxeeya magaaloooyinkaas waxa lagu macnayn karaa arrimo ay ka mid yihiin kala duwanaanshaha fursadaha waxbarasho ee dhallinyarada (ka soo daahidda soo galitaankooda suuqa shaqada); tirada dadka ee dhallinyarada ah; goob kasta iyo dhaqdhaqaqyadeeda dhaqaale; iyo waliba sinnaan la'aanta dakhliyada qoysaska (oo dhallinyarada u oggolaanaya in ay iska noolaadaan iyaga oo aan shaqaynii).

Falanqaynta sare waxa ay ina tusaysaa in shaqo la'aanta dhallinyarada ee magaalo kastaa u baahan tahay istaraatijiyo gaar ah oo xaaladdeeda wax lagaga qaban karo. Marka la dajinayo qorshayaasha kala mudnaanshaha shaqooyinka, waxa loo baahan yahay in tixgalin gaar ah la siiyo noocyada shaqo ee ku habboon wax ka qabashada dhallinyaro kasta baahidooda shaqo la'aaneed. Qaybo badan oo ka mid ah farqiga u dhaxeeya magaaloooyinkaas waxa lagu macnayn karaa arrimo ay ka mid yihiin kala duwanaanshaha fursadaha waxbarasho ee dhallinyarada (ka soo daahidda soo galitaankooda suuqa shaqada); tirada dadka ee dhallinyarada ah; goob kasta iyo dhaqdhaqaqyadeeda dhaqaale; iyo waliba sinnaan la'aanta dakhliyada qoysaska (oo dhallinyarada u oggolaanaya in ay iska noolaadaan iyaga oo aan shaqaynii).

3.3 Farqiga jinsiga ee u dhaxeeya shaqo abuurka dhallinyarada


Marka loo eego dhaqan-dhaqaalaha Soomaaliya, haweenku waxa ay kaga jiraan kaalin aad u liidata oo inta badan waxa ay u halgamaan sidii ay u heli lahaayeen fursado shaqo oo macno leh. Jaantuska 5-aad waxa uu muujinayaa in boqolkiiba 21 qof oo sheegay in ay shaqeeyaan ay haween ka ahaayeen boqolkiiba 3.5, halka ay rag ka ahaayeen 18.4 boqolkiiba.

“

Haweenka dhallinyarada ahi si guud ayey ugu dhibban yihiin xaaladda shaqada suuqa ee cakiran, gaar ahaan waxa sii haysta caqabado ay kala kulmaan helitaanka shaqada. Arrintani waxyaabaha ay salka ku hayso waxa ka mid ah dhaqanka bulshada oo inta badan dumarka u jaangooya hawlaha guriga. Daryeelka iyo masuuliyadaha qoyska oo aan lahayn mushaar haweenka lagu siyo ayaa ka mid ah caqabadaaha qotadadheer ee haweenka ka hortaagan in ay shaqo ka helaan suuqa shaqada ee fadhiidka ah. Dumarku waxa ay inta badan ku hawllan yihiin daryeelka qoyska oo ah hawlo shaqo oo aan mushaar lahayn.⁶¹ Taasina waxa ay caqabad ku tahay in ay haweenku ka qaybgalaan shaqooyinka rasmiga ah iyo kuwa musharka fiican leh. Marka la is barbardhigo, suuqa shaqo ee ragga iyo dumarka, shaqooyinka rasmiga ah waxa loo doorbidaa ragga.

Haweenka dhallinyarada ahi si guud ayey ugu dhibban yihiin xaaladda shaqada suuqa ee cakiran, gaar ahaan waxa sii haysta caqabado ay kala kulmaan helitaanka shaqada. Arrintani waxyaabaha ay salka ku hayso waxa ka mid ah dhaqanka bulshada oo inta badan dumarka u jaangooya hawlaha guriga. Daryeelka iyo masuuliyadaha qoyska oo aan lahayn mushaar haweenka lagu siyo ayaa ka mid ah caqabadaaha qotadadheer ee haweenka ka hortaagan in ay shaqo ka helaan suuqa shaqada ee fadhiidka ah. Dumarku waxa ay inta badan ku hawllan yihiin daryeelka qoyska oo ah hawlo shaqo oo aan mushaar lahayn.⁶¹ Taasina waxa ay caqabad ku tahay in ay haweenku ka qaybgalaan shaqooyinka rasmiga ah iyo kuwa musharka fiican leh. Marka la is barbardhigo, suuqa shaqo ee ragga iyo dumarka, shaqooyinka rasmiga ah waxa loo doorbidaa ragga.

Jaantuska 5-aad: Fursadaha shaqo ee ragga iyo dumarka



“

wax ka qabasho la'aanta dawladda iyo qorshaxumaanta siyaasadeed ayaa caqabad ku noqday in haweenku ka gaybgalaan suuqa shaqada , taasina waxa ay keentay in raggu ku bataan shaqada rasmiga ah


Arrin kale oo muhiim ah ayaa ah in haweenka dhallinyarada ah ay xirfad la'aan iyo aqoon darro iska hortaageen in ay helaan shaqooyin ku habboon. Marka la is garab dhigo ragga iyo dumarka, dumarku ma haystaan shahaadooyinka waxbarasho iyo xirfadaha aqooneed ee looga baahan yahay shaqooyinka rasmiga ah. Daraasad ay samaysay hay'adda Oxfam ayaa lagu ogaaday in dumarka aan haysan aqoonsi waxbarasho oo rasmi ah ay yihiin kuwo boqolkiiba 88 iskood u shaqaystaan.⁶² Waxaa intaa dheer, wax ka qabasho la'aanta dawladda iyo qorshaxumaanta siyaasadeed ayaa caqabad ku noqday in haweenku ka qaybgalaan suuqa shaqada , taasina waxa ay keentay in raggu ku bataan shaqada rasmiga ah.

61. Karamba, Wendy. 2021. Improving Access to Jobs for the Poor and Vulnerable in Somalia. World Bank, Washington, DC. <https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/34983>

62. Oxfam and Save Somali Women and Children, 2021. Gender Gap Assessment in South Central Somalia and Puntland. [https://oi-files-cng-prod.s3.amazonaws.com/heca.oxfam.org/s3fs-public/file_attachments/Gender%20Gap%20Assessment\[1\].pdf](https://oi-files-cng-prod.s3.amazonaws.com/heca.oxfam.org/s3fs-public/file_attachments/Gender%20Gap%20Assessment[1].pdf)


Sida ku cad jaantuska 6-aad, markii dhallinyarada wax laga waydiiyay sida ay u arkaan shaqada, boqolkiiba 88 waxa ay sheegeen in ay si firfircoon shaqo u raadiyeen, halka boqolkiiba 12 ka sheegeen in aanay wax shaqo ah raadsanin. Waxa arrintan loo aanayn karaa in ay dhallinyaro badani wali ku jiraan waxbarasho dugsi ama mid jaamacadeed.

Jaantuska 6-aad: Boqolkiiba inta shaqo ka raadinaysay ka qaybgalayaasha




Xogta sahankan ee ku saabsan doorashada shaqada ama qaybaha ugu soo jiidashada badan ee ay dhallinyaradu jecel yihiin ka shaqayntooda ayaa muujisay in boqolkiiba 34 doorbideen in ay iskoood u shaqaystaan, halka boqolkiiba 22 rabeen shaqada dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyada oo boqolkiiba 12 eexaysteen shaqooyinka bini'aadantinimada. Boqolkiiba 5 kaliya ayaa doortay ganacsiyada qoyska, halka ay ka shaqaynta amniga doorteen tirada ugu yari, (firi jaantuska 7-aad).

Jaantuska 7-aad: Kala doorashada waaxaha shaqada



Waxa kale oo ay daraasaddu ogaatay waxyaalo gaar ah oo ay dhallinyaradu tixgaliyaan marka ay shaqada raadinayaan(ka eeg jaantuska, 8-aad). Waxyaabaha ay doorbidaan waxa ka mid ah mushaar u qalma heerkooda aqooneed, ku sii nagaansha shaqada, xiriirka ay shaqadu la leedahay takhasuskooda, jacaylka ay u hayaan shaqada iyo in ay rabaan shaqo kasta.

Jaantuska 8-aad: Waxyaabaha saameeyaa doorashada shaqada



“


*Dhallinyarada
daraasadda lagu
sameeyay ayaa
sheegay in ay
caqabado badan
kala kulmaan
helitaanka shaqo
raadinta, iyaga oo
xusay in aanay jirin
fursado shaqo oo
macno leh, xirfad
la'aan shaqo,
aragtiyo taban oo
ay ka haystaan
shaqooyinka qaar,
garaabokiil, arrimo
nabadgalyo iyo
takoor jinsi*

Ka qaybgalayaasha inta ugu badan, oo ah boqolkiiba 27 ka mid ah dadkii soo jawaabay, waxa ay sheegen in ay doorbidayaan in ay ka shaqeeyaan shaqo kasta oo ay heli karaan, iyaga oo aan danaynaynin shuruudaha ku xiran shaqadaas iyo mushaarka la siinayo, boqolkiiba 25 waxa ay doorbideen shaqo la xiriirta takhasuskooda, boqolkiiba 18 waxa ay rabeen shaqo mushaar wanaagsan iyo nagaansho leh, boqolkiiba 16 waxa ay danaynayeen shaqooyin mushaar wanaagsan oo la xiriira takhasuskooda, halka boqolkiiba 12 ay xiisaynayeen shaqo ay ku nagaadaan.

3.4 Caqabadaha dhallinyarada ka haysta shaqaalaysiinta

Dhallinyarada daraasadda lagu sameeyay ayaa sheegay in ay caqabado badan kala kulmaan helitaanka shaqo raadinta, iyaga oo xusay in aanay jirin fursado shaqo oo macno leh, xirfad la'aan shaqo, aragtiyo taban oo ay ka haystaan shaqooyinka qaar, qaraabokiil, arrimo nabadgalyo iyo takoor jinsi. Sida ku cad jaantuska 9-naad, eexda iyo la'aanta fursado shaqo ayaa ah dhibaatooyinka ugu waaweyn, oo kala ah boqolkiiba 44 iyo boqolkiiba 20 sida ay u kala horreyaan. Caqabadaha kale ee waawayn ee la xiriira helitaanka shaqada waxa ka mid ah khibrad yaraan ama waayo-aragnimo la'aan oo ah boqolkiiba 11 iyo aqoon la'aan ama tababar yaraan oo ah boqolkiiba 12. Arrimahan waxaa uga sii daray takoorka jinsiga iyo arrimaha amniga.

Jaantuska 9-aad: Caqabadaha
hortaagan helitaanka shaqada



“

*Caqabadda udub
dhexaadka u ah
shaqo la'aanta
dhallinyarada
faraha badan ayaa
ah qaraabokiilka
iyo qabyaaladda.
Daraasaddu
waxa ay daaha
ka qaadysaa
in la isugu
qabyaaladeeyo
xulashada iyo
shaqo qorista iyo
in la siyaasadeeyo
qoritaanka
shaqooyinka
dawladda, kuwaas
oo caqabado
waawayn ku ah
shaqo abuurka
dhallinyarada*

Xaqiicooyinkan ayaa muujinaya heerka uu hadda marayo dhaqaalaha dalku: waayo dhaqaalahu ma dhalin karo fursado shaqo oo ku filan dhallinyarada dalka ee kordhaysa. Si kastaba ha ahaatee, shaqo abuur ku filan oo daboolaya baahida shaqo ee dhallinyarada ayaan jirin, sababta oo ah maalgashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa ah mid aad u hooseeyaa. Waxa kale oo jira caqabado ba'an oo gaar u ah goobaha colaadahu ka jiraan sida Soomaaliya. Haddaba, waxaa lagama maarmaan ah in dadka siyaasadda dejiyaay ay ka fikiraan sidii ay kor ugu qaadi lahaayeen maalgashiga dalka, waana muhiim in ay dhaadaan waxna ka qabtaan waxyaabaha ka qaybqaata fursado xumaanta dhaqaale ee jira sida hay'adaha dawladda ee tabarta daran, kuwaas oo caqabad wayn ku ah maalgashiga gaarka ah iyo shaqo abuurka. Qiimayn ay Hay'adda Socdaalka Adduunku ka samaysay shaqo abuurka dhallinyarada iyo tahriibka sannadkii 2016-kii ayaa sida oo kale lagu sheegay in fursado la'aanta shaqadu tahay caqabadda ugu weyn.⁶³

Caqabadda udub dhetaadka u ah shaqo la'aanta dhallinyarada faraha badan ayaa ah qaraabokiilka iyo qabyaaladda. Daraasaddu waxa ay daaha ka qaadysaa in la isugu qabyaaladeeyo xulashada iyo shaqo qorista iyo in la siyaasadeeyo qoritaanka shaqooyinka dawladda, kuwaas oo caqabado waawayn ku ah shaqo abuurka dhallinyarada. Ka qaybgalayaasha daraasadda boqolkiiba 44 ayaa xusay in shaqo la'aanta dhallinyarada ay sababeen qaraabokiilka iyo qabyaaladdu. Tani la yaab ma laha, oo waxa ay ku caddatay daraasadaha kale ee dalka laga sameeyay. Dhanka Soomaaliya, qiimaynta daraasaddii Hay'adda Socdaalka Adduunka waxa lagu ogaaday in isku xirnaan la'aanta qabiilka iyo isbahaysiga siyaasaddu ay yihiin caqabada dhallinyarada ka haysta helitaanka shaqada.⁶⁴

Arrintani waxa ay muujinaysaa in sida dhallinyaradu u raadiyaan fursadaha shaqo aanay ku xirnay oo kaliya xirfadaha iyo aqoonta ay leeyihiin balse ay ku xiran tahay sida ay ugu xiran yihiin qabiilkooda iyo xiriirrada siyaasadeed ee ay leeyihiin.

Warbixin ay samaysay INCLUDE Knowledge Platform ayaa daaha ka qaadday aragtiyo badan oo ku saabsan caddaalad darrada ku gadaaman helitaanka fursadaha shaqo, iyada oo keentay caddaymo tiro badan oo muujinaya xiriirkha siyaasadeed iyo kuwa qaraabokiilka ee la isku shaqaalaysiyo. Helitaanka shaqadu waxa ay u muuqataa in ay noqotay “yaad taqaannaa” halkii ay ka noqon lahayd “maxaad taqaannaa.”⁶⁵ Warbixintu waxa ay intaa ku dartay in suuqyada shaqada Afrika ee fadhiidka ahi ay qaar ka mid ah dhallinyarada u sahlaan in ay ku naalloodaan ama ku raaxaystaan ku shaqaysiga eexda iyo qaraabokiilka, halka debadda loo tuuro dadkii kale, taasina wax ay keentay caro iyo cuqdad bulsho oo qabiilaysan.

Daraasad ay dhawaan sameeyeen Machadka Heritage (HIPS) iyo Jaamacadda City ee Muqdisho ayaa lagu ogaaday in qaraabokiilku aad ugu badan yahay shaqaalaysiinta iyo xulashada shaqaalaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahayba.⁶⁶

63. IOM youth employment and migration (2016), 43. Accessed at: <https://www.iom.int/sites/g/files/tmzbdl486/files/country/docs/IOM-Youth-Employment-Migration-9Feb2016.pdf>.

64. Ibid.

65. INCLUDE Knowledge Platform, 2020. Promoting Decent Employment for African Youth as Peacebuilding Strategy. Available at: https://www.ilo.org/wcmsp5/groups/public/---ed_emp/documents/publication/wcms_744700.pdf

66. Productive labor and employment creation for Somalia.

Dhaqan xumada shaqo ee noocaan ah ayaa niyad jab iyo saluug ku abuuray dhallinyarada dalka, taasina waxa ay keentay in dhallinyarada aan qabiilka ku xirnayni dhibaato badan kala kulmaan sidii ay shaqo u heli lahaayeen, marka la garabdhigo kuwa ay qaraabadoodu xilal siyaasadeed hayaan. Xiriirada siyaasadda, cadaadiska qoyska, iyo dhibaatooyinka amniga ayaa loo aqoonsaday in ay yihiin sababaha ugu waawayn ee qaraabokiilku uga jiro shaqaalaysiinta Soomaaliya.⁶⁷ Waxa intaa dheer, suuqyada shaqada waxaa si wayn u saameeyay oo isbeddel ku keenay nabadgallyo xumada iyo xasillooni darrada siyaasadeed, kuwaas oo khalkhal ku keenay amniga dalka, isla markaana u baahan in la fahmo oo labadoodaba laga hortago. Marka dhinacyo badan laga eego, shaqo la'aanta dhallinyarada waxa u aabbo ah in lagu guuldarraystay sugitaanka amniga iyo xasilloonida dalka: boqolkiiba sagaal ka mid ah ka qaybgalayaasha daraasaddani waxa ay xuseen in xaaladda amnigu caqabad wayn ku tahay barnaamijyada la xiriira shaqo-abuurka dhallinyarada.

3.5 Saamaynta uu karoonuhu ku leeyahay fursadaha shaqo

Dhallinyaradu waxa ay dhabarka u riteen culayska dhaqaale ee baaxaddaas leh, kaas oo ka dhashay masiibada karoona. Guud ahaan caalamka, saddex siyaabood ayuu Karoonuhu saamayn baaxad leh ugu yeeshay dhallinyarada: waxa uu laf dhuungashay ku noqday dhallinyaradii shaqo raadiska ahayd iyo kuwii markaa suuqa shaqada ku soo biirayay, waxa uu ka carqaladeeyay waxbarashada iyo tababarrada, waxaanu ku keenay khasaare shaqo iyo mid dakhli oo ay u weheliso tayada shaqada oo sii xumaanaysa.⁶⁸ Soomaaliya, masiibada Karoonuhu si aan la filaynin ayay u saamaysay dhallinyarada, iyada oo ku dhawaad saddex-meelood laba meelood ka mid ah ka qaybgalayaasha sahanka (67%) ay sheegeen in uu saameeyay fursadahooda shaqo (eeg Jaantuska 10-aad).


Warbixin uu dhawaan soo saaray Bangiga Adduunku, ayaa lagu sheegay in masiibadaasi suuqa shaqada ee Soomaaliya ku keentay habacsanaan baahsan: boqolkiiba 37 shaqaale oo heshiisyo shaqo ku jiray ayay shaqo la'aani ku dhacday, iyada oo shirkadaha waaweyn iyo kuwa dhexdhedaadka ahi ay fasaxeen shaqaalahooda intii badnayd.⁶⁹ Tani waxa ay hoos u dhigtay rajada dhallinyarada ee la xiriirta helitaanka shaqo faa'iido leh. Dawladaha iyo saaxiibada caalamku waa in ay ka jawaabaan hoos u dhaca fursadaha shaqo, ee uu sababtooda yahay masiibada Karoonaha.

67. Hussein Jimale, Nepotism in the hiring process of the public sector in Somalia (2021), Jowhar. Accessed at: <https://www.jowhar.com/article/nepotism-in-the-hiring-process-of-the-public-sector-in-somalia.html>

68. ILO, Preventing exclusion from the labour market: Tackling the COVID-19 youth employment crisis, ILO Policy Brief, 2020a, https://www.ilo.org/wcmsp5/groups/public/---ed_emp/documents/publication/wcms_746031.pdf

69. World Bank.2021. Somalia Economic update: Investing in Health to Anchor Growth. Accessed at: <https://documents1.worldbank.org/curated/en/926051631552941734/pdf/Somalia-Economic-Update-Investing-in-Health-to-Anchor-Growth.pdf>

Jaantuska 10-aad: Waxa aan rumaysanahay in Karoonuhu saamayn ku yeeshay fursaddayda shaqo



3.6 Caqabadaha amniga

In ka badan soddon sano, ayay Soomaaliya wajahaysay caqabado badan oo dhanka amniga ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin colado beeled, malleeshiyaad hubaysan, boob, iyo waliba kacdoonnada malleeshiyadka al-Shabaab.⁷⁰ Boqollaal kun oo Soomaali ah ayaa lagu dilay, malaayiin kalena waa lagu barakiciyay. Ma jiro gobol ama magaalo ka tirsan Soomaaliya oo loo arko in ay gabii ahaan ammaan tahay. In kasta oo dadka waqooyiga Soomaaliya ay weli la daalaadhacayaan dagaallo beeledyo soo noqnoqday iyo danbiyo⁷¹ kale oo gacan ka hadal ah, kuwa koofurta iyo bartamaha dalka ku sugani waxa ay la nool yihiin “argagixiso ba’an”, iyada oo aan la ogayn halka ay ku hooban doonaan iyo goorta ay dhici doonaan qaraxyada soo socdaa.⁷² Dalka waxa ka jira dhawr dagaal beeled oo u muuqda kuwo sii xumaanaya. Waxaa intaa dheer, kor u kaca xagjirnimada oo dalka ku haysa caqabado xagga amniga ah. Dhibaatooyinkan iyo fal-danbiyeedyada soo noqnoqda ayaa abuuray amni la'aanta iyo xasillooni darrada baaxadda leh, kuwaas oo laga yaabo in ay saameeyaan hindisayaasha horumarinta bulshada iyo kuwa dhaqaale ee dalka.

“

*Ma jiro gobol ama
magaalo ka tirsan
Soomaaliya oo
loo arko in ay gabii
ahaan ammaan
tahay*


70. Vanda Felbab-Brown, “The Problem with Militias in Somalia: Almost Everyone Wants Them Despite Their Dangers,” in Hybrid Conflict, Hybrid Peace: How Militias and Paramilitary Groups Shape Post-conflict Transitions, ed. Adam Day (New York: United Nations University, 2020). <https://i.unu.edu/media/cpr.unu.edu/post/3895/HybridConflictSomaliaWeb.pdf>

71. International Crisis Group, 2018. Averting War in Northern Somalia. <https://www.crisisgroup.org/africa/horn-africa/somaliland/141-averting-war-northern-somalia>


72. The Danish Immigration Service Brief Report, 2020. South and Central Somalia security situation, forced recruitment and conditions for returnees. <https://www.justice.gov/eoir/page/file/1309016/download>

Ka qaybgalayaasha badankoodu waxa ay aammisan yihiin in fal-danbiyeedyada shuftadu gaysataa ay yihiin caqabada ugu waawayn ee keenay amni darrada (eeg jaantuska 11-aad). Boqolkiiiba 55 ayaa sheegay in kooxaha shuftada ah ee ku hawllan tuuganimada hubaysan ay yihiin caqabadda ugu wayn ee amni darrada ku keentay magaaladooda, waxa ku xiga in ay yihiin kooxaha xagjirka ah oo ahaa boqolkiiiba 21. Dhammaan magaaloooyinkii daraasadda laga sameeyay, boqolkiiiba 11 waxa ay sheegeen in colaadaha ka dhaxeeya beelahu ay yihiin dhibaatooyinka amni ee halista ah, sababta oo ah colaadaha qabiilku waxa ay ku badan yihiin dhulka miyiga ah, taas oo ay ugu wakan tahay ceelka, carshinta iyo deegaanku. Si kastaba ha ahaatee, baryahan danbe waxa hoos u dhacay soo noqnoqoshada iyo xaddiga colaadaha beelaha u dhaxeeya. Boqolkiiiba lix kaliya ayaa sheegay in qalalaasaha doorashadu tahay caqabad wayn oo amni.

Jaantuska 11-aad: Dhibaatooyinka amni ee
ugu waawayn



Jaantuska 12-aad: Xaaladda amniga



Xogta sahanku waxa ay ayidaysaa aragtii hore oo daraasadeed taas oo sheegaysay in shaqo la'aantu dhallinyaro badan oo Soomaaliyeed ku riixdo fal-danbiyeedyo, taas oo ka qaybqaadata xaqiilooyinka dalka ka jira ee la xiriira dhibaatooyinka amniga. Ka qaybgalayaasha badankoodu arrintaas ayay u aaneeyeen shaqo la'aanta. Tusaale ahaan, daraasad ay samaysay ILO 2019-kii oo cinwaankeedu ahaa "Barnaamijyada Shaqada iyo Colaadaha Soomaaliya," ayaa sheegay in shaqo la'aanta xad dhaafka ahi si wayn ugu xiran tahay colaadaha iyo amni darrada.

“

*Shilalkas amni ee
lama filaanka ah
ayaa curyaamiyay
dadaaladii loogu
jiray dibudhiska
dhaqaalaha
dalka, iyaga oo
is hortaagay
maalgashiga,
hoosna u dhigay
xaddiga shaqo
abuurka*

Waxa kale oo ka qaybgalayaasha daraasaddan la waydiiyay xaaladda amni ee deegaankooda (eeg jaantuska 12-aad). Inkasta oo ay magaaloooyinkii sahanka lagu sameeyay al-Shabaab ku tahay halis amnio o joogto ah, boqolkiiiba 54 ayaa aamminsan in xaaladda amnigoodu dhedhexaad tahay, halka ay boqolkiiiba 39 ka sheegeen in amnigoodu wanaagsan yahay. Boqolkiiiba todoba kaliya ayaa sheegay in xaaladda amnigoodu xun yahay. Marka la isku soo duuduubo, xaaladda nabadgalyada Soomaaliya waa mid wali liidata, maadaama al-Shabaab ay markasta fulinayso weerarro ay qaraxyo iyo afduub kula beegsanayso dadka shacabka ah iyo saraakiisha dawladda.

Dagaallo beelaysan ayaa iyaguna ka jira Soomaaliya, kuwaas oo mararka qaar sababa dhimasho badan.⁷³ Dagaallada u dhaxeeya beelaha ee la xiriira khayraadka dalka ayaa inta badan keena isku dhacyo hubaysan. Shilalkas amni ee lama filaanka ah ayaa curyaamiyay dadaaladii loogu jiray dibudhiska dhagaalaha dalka, iyaga oo is hortaagay maalgashiga, hoosna u dhigay xaddiga shaqo abuurka.⁷⁴ Caqabadaha iyo khataraha isbiirsaday ayaa boqno gooyay Soomaaliya, oo iska hortaagay in ay ku naallooto nabad waarta. Qalalaasaha siyaasadeed ee joogtada noqday, gaar ahaan kuwa hay'adaha dawladda iyo siyaasadda liidata ayaa dabray dadaallada loogu jiro nabadaynta iyo horumarinta dhagaalaha.

3.7 Waxyaabaha keena amni darrada iyo rabshadaha


Waxyaabaha keenay in shaqo la'aanta dhallinyaradu noqoto khatarta ugu wayn ee aasaaska u ah amniga iyo xasiloona Soomaaliya ayaa ah xiriirka ka dhaxeeya dhallinyarada aan haysan fursada dhaqaale, suuqa shaqada ee takoorku ka jiro iyo halista ay leeyihiin rabshadaha dagaallada wata iyo amni darradu. Dhallinyaro badan ayay shaqo la'aantu ku kalliftay in ay fursado dhaqaale ka raadiyaan fal-danbiyeeddada, sida tuuganimada, ku biiridda kooxaha xagjirka ah, malleeshiyaadka beelaha iyo kooxaha siyaasadda. Dhaqaalaha dalka ee cid gaar ahi dheefsato,kuwo kalana laga dhaariiyay iyo cadaawadaha guunka ah ee ka dhex jira beelaha Soomaalida ayaa salka ku haya fursadaha dhaqaale ee dalka ku yar, waana sababta keentay in dhallinyaradu ku kacaan rabshado dhagaraysan. Xaaladahaas dhaqaale waxa uga sii daray kooxaha iyo malleeshiyaadka hubaysan, oo ka faa'iidaysta amni darrada iyo xisilooni la'aanta.⁷⁵

73. Hiraal Institute, Monthly Incident Report (October 2020).¹

74. ILO, Employment programs and conflict in Somalia (2019). Accessed at: https://www.ilo.org/wcmsp5/groups/public/-/-dgreports/-/-inst/documents/publication/wcms_734237.pdf

75. Ibid.

Jaantuska 13-aad: Waxyaabaha dhallinyarada ku riixa ka qaybgalka rabshadaha



Marka loo eego xaaladda lagu jiro, ma aha wax lala yaabi karo in ka qaybgalayaashii daraasadda in ka badan kala bar (boqolkiiiba 58) ay shaqo la'aanta dhallinyarada ku sheegaan arrin halis wayn ku ah amniga, sababta oo ah waxa ay dhaxalsiisay in ay ku lugyeeshaan rabshadaha (eeg jaantuska 13-aad). Intaa waxa dheer, waxbarasho la'aanta ayaa iyaduna ka mid ah waxyaabaha keenay rabshadaha iyo amni darrada ka jirta Soomaaliya. Boqolkiiiba 22 ka mid ah jawaabayaasha ayaa xusay in waayitaanka waxbarashadu qayb ka tahay waxyaabaha dardargaliya amni darrada. Kala qaybinta ku salaysan eexda iyo qaraabokiilka ayaa sida oo kale ka qaybqaata amni darrada, waxaana sii xumaada tabashoooyinka ka dhasha takoorka, kuwaas oo is hortaagay xasiloonida iyo amniga Soomaaliya.


Shaqo la'aantu waa sharka dhallinyarada ku qalqaaliya fal-dambiyeedyada, sida tuugada hubaysan, isticmaalka maandooriyaha, iyo kuksiga. Waxa la waydiiyay sida ay u arkaan xiriirka ka dhaxeeya shaqo la'aanta iyo amniga, iyada oo la adeegsanayo halbeeg lagu cabbiyaro inta uu leegyahay xaddiga ay dhallinyarada bilaa shaqada ahi kaga qaybqaadan karaan fal-danbiyeedyada.

“

*boqolkiiiba 79
jawaabe ayaa
muujiyay in ay si
wayn u raacsan
yihiiin ama si
wayn uga soo
horjeedaan
dhallinyarada bilaa
shaqada ahi in ay
u nugushahay ka
qaybgalka fal-
danbiyeedyada
ragaadiyay amniga
dalka*

Sida ka muuqata Jaantuska 14-aad, boqolkiiiba 79 jawaabe ayaa muujiyay in ay si wayn u raacsan yihiiin ama si wayn uga soo horjeedaan dhallinyarada bilaa shaqada ahi in ay u nugushahay ka qaybgalka fal-danbiyeedyada ragaadiyay amniga dalka. Boqolkiiiba 40 ayaa ku jawaabay in ay dhexdhexaad yihiiin, halka ay boqolkiiiba 10 ku jawaabeen aad baannu uga soo horjeednaa. Natijjooyinku waxa ay xaqqiyyeen in caqabadaha kala duwan ee amniga dalka soo foodsaaray ka qaybqaateen shaqo la'aanta. Qiimayn ay hay'adda Mercy Corps ka samaysay Soomaaliya ayaa iftiimisay in xasilooni darrada baahsan ee dalka ka jirtaa tahay xaqiyo aan la dafiri karin, maadaama dadka badankiisu yahay sabool gaajaysan, dhallinyaro badanina bilaa shaqo yihiiin.⁷⁶

Jaantuska 14-aad: Wawa aan aamminsanahay in shaqo la'aantu keento fal-danbiyeedyada dalka ka dhaca



“

*Fursado la'aanta
shaqo ayaa
dhallinyarada
u nugleeyay
kuna riixay in ay
ku kacaan fal-
danbiyeedyo u
galay kaalintii
dhaqaale ee ay
noloshooda ku
dabbari lahaayeen*

Fursado la'aanta shaqo ayaa dhallinyarada u nugleeyay kuna riixay in ay ku kacaan fal-danbiyeedyo u galay kaalintii dhaqaale ee ay noloshooda ku dabbari lahaayeen. Haddii aynnu si kale u dhigno, la'aanta fursado dhaqaale oo laga helo mushaar micno leh, ayaa dhallinyaro badan ku xanbaaray in ay ku kacaan fal-danbiyeedyada ay ka midka yihiiin tuugada hubaysan. Tusaale ahaan, sannadahihii u danbeeyay waxa magaalada Muqdisho ku soo batay shuftadada hubaysan ee habeenkii moobililla dadka ka qaadda. Dhibbanihii ugu danbeeyay waxa uu ahaa wiil yar oo ay moobilkiisa ku dileen shufto hubaysani bishii Disember 2021-kii.⁷⁷ Danbiyada noocan ahi waxay ay qayb ka yihiiin dhallinyarada Muqdisho ku soo badanaya ee la daalaadhacaya nololmaalmeedka naf hurka ah.

76. See Mercy Corps, Youth and consequences: Unemployment, injustice and violence (2015). Accessed at: https://www.mercycorps.org/sites/default/files/2020-01/MercyCorps_YouthConsequencesReport_2015.pdf

77. See Hiiraan, Young man shot and killed during robbery in Mogadishu (2021), accessed at: https://www.hiiraan.com/news4/2021/Nov/184440/young_man_shot_and_killed_during_robbery_in_mogadishu.aspx.

Waxa intaa dheer, daraasad uu soo saaray Bangiga Adduunku ayaa sheegtay in nasiib darrada dhaqaale ee ku habsatay dhallinyarada Soomaalida ay ugu wacan tahay in ay si xad-dhaaf ah ugu lug yeeshaan kooxa xagjirka ah, colaadaha, tuugada iyo kufsiga. Si kastaba ha ahaatee, saamaynta ugu wayn ee ka soo baxday natiijooyinkii sahankan ayaa ah in boqolkiiba 22 dhallinyaro ahi ku biiraan kooxaha xagjirka ah, marka la barbardhigo cilmibaaristii hore. Waxa arrintan qayb ka ah kooxaha xagjirka ah oo qorta dhallinyarada reer miyiga ah ee aan haysan fursado waxbarasho iyo kuwa shaqo ama shaqadoodu liidato. Si kale haddii aynnu u niraahno, meelaha ay ka jiraan dhibaatooyinka la xiriira fursadaha dhaqaale, dhallinyarada waxa lagu qasbi karaa in ay fuliyaan shaqooyinka sharci darrada ah iyo rabshadaha dhaqaalahi lagu helayo. Marka ay dhallinyaradu waayaan fursado shaqo oo ay noloshooda ku dabbaraan waxa laga yaabaa in ay ku kacaan fal-danbiyeedyo ay dhaqaale ku raadinayaan, taasina waxa ay ka qaybqaadanaysaa shaqaaqooyinka iyo xasillooni darrada dalka ka jirta. Haddii aan wax laga qaban shaqo la'aanta dhallinyarada, horumarka mustabalka dalka waxa laf dhuungashay ku noqon doona tirada dhallinyarada ee sii badanaysa, kuwaas oo quus ka jooga in ay helaan dhaqaale hufan oo u qalma. Fursadaha lagu heli karo nabad, xasillooni, iyo horumar dhab ah waa ay sii yaraanayaan ilaa inta dhibaatadan wax laga qabanayo.

3.8 Dhallinyarada bilaa shaqada ah ee ku biiraya dagaal ogayaasha

Sannadihii u danbeeyay, waxa Soomaaliya ku soo batay rabshadaha la xiriira xagjirnimada, maadaama dhallinyaro badan oo Soomaaliyeed ku biireen kooxaha xagjirka ah, kuwaas oo saamayn xun ku yeeshay amniga dalka. Shaqo la'aanta baahsan ee dalka ka jirta, oo ay uga sii dartay maamul xumadu ayaa sahashay in ay degdeg u kordhaan kooxaha xagjirka ahi.


Dhallinyarada dhaqaale raadiska ah ee ka soo jeedda biehalaha la hayb-sooco waxa ay intooda badani ku biiraan al-Shabaab, si ay u daboolaan baahidooda dhaqaale (boqolkiiba 27 ayaa kooxaha ugu biira sababo dhaqaale).⁷⁸ Daraasad ay 2017-kii samaysay Jaamacadda Qaramada Midoobay ayaa lagu ogaaday in saddex meelood labo meelood oo ka mid ah xubnaha ururka al-Shabaab ay ugu soo biireen sababo dhaqaale, maadaama ay ka rajo dhigeen kasbashada dhaqaale sharciya, waxaana sababay cuqdadaha beelaysan ee ka dhashay hayb-sooca ama ka dhiidhiga xadgudubyada dawladdu gaysato iyo musuqmaasuqa.⁷⁹

78. Anneli Botha and Mahdi Abdile, Radicalisation and al-Shabaab recruitment in Somalia, ISS Paper 266, Institute for Security Studies, Pretoria (2014).


79. See also United Nations Development Programme, Journey to extremism in Africa: Drivers, incentives, and the tipping point for recruitment (New York: UNDP, 2017). Accessed at: <http://journey-to-extremism.undp.org/content/downloads/UNDP-JourneyToExtremism-report-2017-english.pdf>

Dooddani waxa ay ku salaysan tahay natijjooyinkii sahankayaga, waxaanay muujinaysaa in fursadaha dhaqaale ee liita sida shaqo la'aantu dhallinyarada u horseedaan samaynta ficillada dhagaraysan. In kasta oo ay sababo kala duwan dadku ugu biiraan kooxaha rabshadaha wada, al-Shabaab —oo ay ku bahoobeen xagiirayaal Islaam sheegta iyo “danaystayaal dhaqaale” oo aan haysan wax kale oo ay dhaafsadaan amaba sababo dhaqaale u doonaya in ay colaaddu sii socoto—ayaa dhab ahaan ka kooban dhallinyaro laga soo shaqaalaysiyyah shabakadaha maxalliga ah, kuwaas oo ka soo jeeda qabiillada ay deegaannadooda al-Shabaab maamusho.⁸⁰

Jaantuska 15-aad: Waxa aan aamminsanahay in dhalliyarada bilaa shaqada ahi u nugushahay shaqaalaysiinta kooxaha rabshadaha wada



Jaantuska 16-aad: Waxa aan rumaysanahay in barnaamijyada shaqadu yaraynayaan rabshadaha dhallinyarada



“

*In ka badan
boqolkiiba 70
ayaa qabay in
dhallinyarada bilaa
shaqada ahi aad
ugu nugushahay
ku biirista kooxaha
rabshadaha wada,
taas oo muujinaysa
in ay aragtidan
raacsan yihiin
ama si xooggan u
raacsan yihiin*

Jawaab bixiyayaasha ayaa la waydiiyay sida ay u arkaan in dhallinyarada bilaa shaqada ahi u nugul yihiin in ay qortaan kooxaha rabshadaha wadaa. In ka badan boqolkiiba 70 ayaa qabay in dhallinyarada bilaa shaqada ahi aad ugu nugushahay ku biirista kooxaha rabshadaha wada, taas oo muujinaysa in ay aragtidan raacsan yihiin ama si xooggan u raacsan yihiin. Boqolkiiba sagaal kaliya ayaa diiday ama si adag u dadafeeyay aragtidan (Jaantuska 15-aad).

Tani waxa ay si cad u iftiiminaysaa saamaynta ay xaaladaha shaqadu ku leeyihiin in dhallinyarada Soomaaliyeed ku biiraan kooxaha rabshadaha wada sida al-Shabaab. Waxa kale oo ay u marag furysaa natijjooyinkii daraasadaha hore. Warbixin ay 2017-kii soo saartay Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan horumarinta (UNDP) ayaa ku sii xoojinaysa wajiyada dhaqaalaha: in ay dadka la nool faqriga noocyadiisa kala duwan (iyo kuwa ku jira xaaladaha dhaqan-dhaqaale ee saboolka ah) ka faa'iidaystaan kooxaha rabshaduhu si ay ugu shidaaliyaan qulqulatooyinka ay wadaan.⁸¹ Haddaba arrintani waxa ay muujinaysaa muhiimadda ay dhallinyaradu siinayo sheekoooyinka ku dhiirrigalinaya in ay soo gudbiyaan cabashooyinkooda iyo rajo beelka dhaxalsiiyay in ay ku kacaan rabshadaha.

80. Vanda Felbab-Brown, “The problem with militias in Somalia: Almost everyone wants them despite their dangers,” in Hybrid Conflict, Hybrid Peace: How Militias and Paramilitary Groups Shape Post-Conflict Transitions, ed. Adam Day (New York: United Nations University, 2020). Accessed at: <https://i.unu.edu/media/cpr.unu.edu/post/3895/HybridConflictSomaliaWeb.pdf>

81. Ibid.

Waxa intaa dheer, aragtida ay qabaan Collier iyo Howeffler ayaa ku doodaysa marka ay dalalku ku guuldarraystaan in ay abuuraan shaqooyin wax ku ool ah, ee ay ku bataan xaddiga shaqo la'aanta iyo dhallinyarada bilaa aqoonta ahi, waxa ay noqonayaan kuwo u nugul in ay ka dhacaan qalalaase iyo colaado. Sida ka muuqata natijada daraasaddan, warbixin nadii u danbeeyay ee ka hadlayay natijada shaqo la'aanta dhallinyarada badankoodu may sharraxin waxyaabaha badan ee keena rabshada dhagaraysan. Daraasadahaas Soomaaliya laga sameeyay waxa kaliya oo ay istusaan in dhallinyarada bilaa shaqada ahi u nugul yihiin in ay ku biiraan kooxaha argagixisada. Figradaha noocaas ahi waxa ay iska indhotiraan in ay shaqo la'aanta dhallinyaradu keento cawaaqib xumoooyinka kale oo ay ka midka yihiin rabshadaha iyo colaadaha ka jira Soomaaliya, sida rabshadaha la xiriira tuugada, colaadaha beelaha iyo qulqulatooyinka siyaasadda.

“

*Barnaamijyada
shaqo abuurka
dhallinyaradu
muuhiimad wayn
bay u leeyihiin
dalalka ka
soo kabanaya
colaadaha
dabadheeraaday
iyo xasilooni
darrada iyo
la tacaalidda
halisaha badan
ee ka dhashay
rabshadaha iyo
nuglaanshaha
dalka*

Barnaamijyada shaqo abuurka dhallinyaradu muuhiimad wayn bay u leeyihiin dalalka ka soo kabanaya colaadaha dabadheeraaday iyo xasilooni darrada iyo la tacaalidda halisaha badan ee ka dhashay rabshadaha iyo nuglaanshaha dalka. In kasta oo yoolasha iyo baaxadda barnaamijyada shaqaalaysiintu kala duwan yihiin, haddana dhammaantood waxa ay ku shaqeeyaan fikradda ah in dhallinyarada bilaa shaqada ahi halis ugu jirto in ay ku kacaan fal-danbiyeedyo, haddii aan la siinnin fursado shaqo oo kor loogu qaado adkaysigooda iyo horumarinta nabadda. Si kastaba ha ahaatee, horumarinta fursadaha shaqo ee dhallinyarada ayaa guud ahaan ka maqan dadaalada loogu jiro amniga iyo nabadaynta Soomaaliya.

Dhallinyaradu warbixintan laga diyaariyay badankoodu waxa ay aaminsanaayeen in barnaamijyada shaqaalaysiintu yareeyaan xaddiga ay dhallinyaradu kaga qaybqaadan karto rabshadaha. Sida ku cad Jaantuska 16-aad, ka qaybgalayaasha badankooda oo noqonaysa boqolkiiiba 74 ayaa isku raacay ama si adag iskugu raacay in shaqaalaysiintu tahay hab lagu niyad jabiyo dhallinyarada, kuna kallifa in ay ku biiraan kooxaha rabshadooleyaasha ah. In yar ayaa diidday ama si adag u khilaafatay aragtidaas. Tani waxa ay muujinaysaa noocyada rabshadaha ee la xiriira shaqada sida amni darrada, iyo xasillooni la'aanta, waxaanay caddaynaysaa in aanay fal-celinta milaterigu ku filnayn sugitaanka amniga iyo wax ka qabashada hawlahaa baaxadda leh ee kor loogu qaadayo amniga Soomaaliya.

4. Gunaanad

In kasta oo labaatankii sano ee u danbeeyay dawlad la dhisayay, haddana waxa ay wali la daalaadhacaysaa haliso farabidan, oo ay ugu wacan tahay horumar la'aan joogtada ahi. Dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah federaalka, oo taageero ka helaya saaxiibbada caalamka ayaa sameeyay dadaallo la taaban karo oo ku aaddan sidii dalka looga dhigi lahaa mid nabdoon, balse waxa soo foodsaaray caqabado waawayn oo lagaga gudbi karo nabad waarta iyo soo kabasho dhaqaale. Maadaama uu dalku si tartiib tartiib ah uga soo kabanayo colaado dabadheeraaday iyo habacsanaan baahsan, haddana fursado la'aanta dhaqaale ee haysata dhallinyarada Soomaaliyeed ayaa caqabad wayn ku ah amniga iyo horumarka dalka. Waxyabaha caqabadda ku ah in dhallinyaradu shaqo hesho waxa ka mid ah, khibrad la'aanta, waxbarashada iyo tababarrada oo ku yar, takoorka jinsiga iyo guud ahaan arrimaha amniga dalka oo isu biirsaday.

Ku dhawaad boqolkiiba 70 ayaa bilaa shaqo ahaa dhallinyaradii warbixintan lagu waraystay, waxaana sababay fursado la'aan shaqo iyo xirfad yaraan. Fursadaha shaqada oo xaddidan ayaa ah caqabadda ugu wayn ee haysata dhallinyarada shaqo doonka ah, sida oo kale eexda iyo qaraabokiilka ayaa ah caqabad saamayn wayn ku leh shaqaalaysiinta. Shaqaalaysiintu waxa ay ku xiran tahay reernimo iyo xiriirro siyaasadeed, taasina waxa ay keentay in haybsooc iyo takoor lagu kala xigtaysto fursadaha dhaqaalaha. Shaqo la'aanta dhallinyarada waxa uga sii daaray cudurka Karoonaha, oo sii xumeyay fursadaha shaqo helista, taasina waxa ay sii fogaysay quotada iyo baaxadda shaqo la'aanta.

Dhibaatooyinka la xiriira amniga sida tuugada hubaysan, kooxaha xagjirka ah iyo colaadaha beelaha ayaa wali halis wayn ku haya Soomaaliya, waxaanay u baahan yihiin falcelin dhaqaale oo ay ku bahoobaan dowladda faderaalka, dawlad goboleeddadeeda iyo saaxiibbadeeda caalamku, si ay falcelintooda ugu saleeyaan mudnaansiinta shaqo abuurka. Fursado la'aanta dhaqaale ayaa dhallinyaro badan ku riixday in ay si wayn ugu tiirsadaan dhaqaalaha ka soo galaya hawlahar sharci darrada ah sida tuugada hubaysan iyo ku biiritaanka al-Shabaab. Dagaal oo geeyaasha ayaa shaqaalaysiyya dhallinyarada iyaga oo uga faa'iiday sanaya baahidooda dhaqaale. Soomaaliya waxa ay u baahan tahay in ay wax ka beddesho aragtideedii ku salaysnayd falcelinta millateriga, waana in ay u guurto hannaan nabadayneed oo dhaqangal ah. Sidaas darteed, waa in ay xoogga saartaa waxyabaha udub-dhaxaadka u ah xasilooni la'aanta iyo amni darrada. Natijjooyinka warbixin siyaasadeeddan ayaa iminka muujinaya in dhallinyarada bilaa shaqada ahi aad ugu nugushahay ku biirista kooxaha dagaal oo geeyaasha ah, waxaana keenay takoorka iyo hayb-sooca dhaqaale, oo ah halka ay salka ku hayso shaqaalaysiintu.

5. Talooyin Siyaasadeed

Isku dayga ku salaysan xoojinta amniga dalka ee la doonayo in amni iyo xasilooni waarta lagu gaaro tallaabo militeri, ma aha wax ka suuragalaya Soomaaliya, haddii aan lagu kaabin qorshe-siyaasadeed dhaqaale oo si cad wax uga qabanaya amni darrada dalka ka jirta. Warbixintan ayaa muujinaysa baahida loo qabo shan qorshe-siyaasadeed oo kala duwan, kuwaas oo gunta ka xiriirsan, laguna doonayo in wax lagaga qabto shaqo la'aanta baahsan ee dhallinyarada, si loola macaamilo saamaynta fog ee amniga iyo xasiloonida Soomaaliya. Waana kuwan soo socda:



Ugu horrayn, waxa ay Soomaaliya horumarro cusub ka gaartay dib u habaynta kaabayaasha dhaqaalaha, sida waddooyinka iyo xarumaha hay'adaha dowladda ee ku kala yaalla meelo badan oo dalka ka mid ah. Shaqooyinka dawliga ah waa in laga shaqaalaysiyyaa dhallinyarada xirfaddoodu hoosayso. Shaqo abuurka noocan ah, ee lagu beegsanayo cid gaar ah waxa si dhab ah uga faa'iidaysan kara dhallinyarada sii badanaysa ee aan xirfadda Lahayn, waxaana mudan in xoogga la saaro barnaamijiyada horumarineed ee diiradda lagu saarayo awoodda loo leeyahay hawlahan badan ee degdeega ah. Mashaariicda dawliga ah ee hadda socdaa waa in ay ku tiirsanaadaan awoodda iyo waxqabadka gudaha, oo aanay noqon kuwo debedda laga soo dhoofiyo.



Laba, waa in ilaha dhaqaalaha ee Soomaaliya la ballaariyo oo la abuuro ila cusub oo dhaqaale si mihiimad wayn loo siiyo abuurista shaqooyin waara iyo bixinta shaqo ku filan dhallinyarada oo heer sarraysa. Ujeeddada hawlgalladu waxa ay ahayd in lagu horumariyo qaab-dhismeedka warshadaha, taageeridda ganacsiga gaarka ah ee dalka gudahiisa iyo suuqyada shaqada, si loo soo jiito maalgashiga shisheeyaha, sida oo kale waxa loo qorsheeyay in lagu xoojiyo iskaashiga waaxaha dhaqaalaha kaas oo taageeri doona hadafka ballaaran ee isbeddelka dhaqaalaha, isla markaana abuuraya fursado shaqo oo loogu talagalay dhallinyarada tiradoodu sii kordhayso. Waa muhiim in kor loo qaado dhaq-dhaqaaqyada dhaqaale, si looga guuro beerashada qadiimiga ah ee hadda jirta oo soo saarta adeegyo qiimahoodu hooseeyo, loona dardargaliyo hab-beerashada ganacsiga ee casriga ah, dhaqaalaha la jaanqaadaya tignoolajiyadda casriga ah iyo adeegyada qiimaha sare leh.



Saddex, boqolkiiba 34 ayaa dhallinyaradii la waraystay sheegay in ay doorbidayaan ganacsi madaxbannaan oo ay iskood u leeyihii. Haddaba waa in ay dawladda faderaalka Soomaaliya iyo dawlad goboleedyadu dejyaan nidaam hay'addeed oo dhaqaale soo saaraya, iyada oo la hubinayo suuragalmimada dhallinyarada Soomaaliyeed kula kulmaan caqabado daymeed. Kor u qaadista helitaanka maaliyadeed, ayaa noqon kara istaraatijiyyad wax ku ool ah oo lagu maalgeliyo ganacsiga badaxabannaan ee wax soo saarka leh. Baahida loo qabo in la isku xiro helitaanka adeegyada maaliyadeed iyo barnaamijiyada kobcinta awoodda sida horumarinta xirfadaha iyo barnaamijiyada tababarka ayaa muhiim u ah in dhallinyaradu awood u yeelato abuurista iyo joogtaynta shaqo wax soosaar leh- xaaladdan dagaal ka soo doogga ah. Kor u qaadista kasbashada dhaqaale ayaa hoos u dhigi karta xaddiga dhallinyarada ah ee u janjeedha in ay ku kacaan fal-danbiyeedyada, maadaama abuurista fursado badan oo dhaqaale ay yarayn doonaan saboolnimada. Waa in iminka la xoojiyaa lagana faa'iidaystaa shabakadaha soo badanaya iyo xarumaha shaqo-abuurka si kor loogu qaado ganacsiga iyo hal-abuurkiisa.



Afar, waa in ay dawladda faderaalka iyo dawlad goboleedyadu soo celiyan barnaamijiyadii shaqooyinka dadwaynaha si loo meeleyo aqoonyahanka badan ee soo qalinjabinaya. Sannadihii u danbeeyay, dawladda faderaalku may shaqaalaysiin shaqaale rayid ah, waxaana sababay caqabado miisaaniyadeed iyo la'aanta go'aammo dib loogu habaynayo adeegyada waaxda rayidka. Ka qaybgalayaal badan oo ka mid ah dhallinyaradii daraasaddan lagu waraystay ayaa sheegay in ay doorbidayaan shaqooyinka dawladda. Inkasta oo dhaqaaluhu xaddidan yahay, haddana waa in ay dawladdu dhallinyaro cusub ka shaqaalaysiisaa wasaaradaha iyo ha'adaha kale ee dawlaada, iyada oo la higsanayo yoolal fogfog oo kor loogu qaadayo tayada awooddooda iyo waxqabadka dhallinyarada. Waa in dadaalladaas lagu daro barnaamijyo kaabis ah oo dhallinyarada lagu barayo shaqada (internships) iyo tababarro xirfaddooda kor loogu qaadayo, si loogu qalabeeyo shaqooyinkooda mustaqbal ee ay ka qaban doonaan waaxaha gaarka loo leeyahay iyo ururrada aan dawliga ahayn.



Shan, mabaadii'da shaqo abuurka waa in lagu saleeyaa u sinnaanta dhammaan dhallinyarada Soomaaliyed, iyada oo aan loo eegaynin jinsigooda iyo qabiilkooda toonna. Waa in ay dawladda faderaalka iyo dawlad goboleedyadu dajiyaan habraacyo siyaasadeed oo ku saabsan in haweenka laga shaqaalaysiyo waaxda dawliga ah. Dumarku waa udub-dhexaadka dhaqan-dhaqaale ee bulshada Soomaaliyed, waxaanay qayb libaax ka qaateen soo kabshadii dagaallada iyo horumarinta dalka. Nadijjadii daraasaddani waxa ay muujinaysaa in hab-dhaqanka ku salaysan takoorka shaqadu dhallinyarada ku riixo ka qaybgalka dagaallada iyo fadqalallooyinka. Sidaa darteed, waxa lagama maarmaan ah in la dhiirrigaliyo u sinnaanta, hufnaanta iyo nidaam shaqaalaysiineed oo adag, si meesha looga saaro takoorka lagu hayo qaybo ka mid ah bulshada Soomaaliyed, waayo arrintaasi waxa ay shidaalisaa tabashoooyinka dhaliya halisaha degdeg ah ee ku gadaaman amniga iyo xasiloonda dalka. Hababkan waa in la dhaqangaliyaa si looga war helo tabashoooyinka, loona kormeero hannaanka shaqaalaysiinta-si loo hubiyo caddaalada.



Lix, dawlada faderaalka Soomaaliya iyo dawlad goboleedyada oo ay taageerayaan saaxiibbada caalamku, waa in ay ballaariyaan helitaanka barnaamijyada waxbarashada iyo tababarrada dhallinyarada. Kor u qaadista maalgalinta cududda bulshadu waa arrin aad muhiim ugu ah wax ka qabashada shaqo la'aanta dhallinyarada iyo xallinta halisaha ku xeeran amniga qaranka iyo xasilooniisa. Dhallinyaro badan ayaa shaqo ku waayay caqabado la xiriira xirfad la'aan, tababar la'aan iyo aqoon la'aan. Dib u dhiska dugsiyada farsamada gacanta ayaa ka mid ah ballaarinta xirfadaha ay u baahan yihiin dhallinyaradu, iyada oo dibuhabayn lagu samaynayo manhajka si loo bixiyo xirfado la jaanqaadaya baahida suuqa, yaraynayana caqabadaha qaab-dhismeed ee wiiqaya tayada waxbarashada, sida siyaasadaha iyo qiimaha la xiriira waxbarashada gaarka loo leeyahay, taas oo inta badan is hortaagtga helitaanka iyo goynta waxbarasho tayo leh.

Ugu danbayn, waa in ay dhammaan heirarka dawladda iyo loo shaqeeyayaasha waaxaha gaarka loo leehay si degdeg ah u sameeyaan dadaallo adag oo wax lagaga qabanayo shaqo la'aanta dhallinyarada si looga taqaluso amni darrada iyo xasilooni la'aanta Soomaaliya aafeeyay, loona gaaro nabad waarta. Haddii aan sidaas la yeelin waxa dhicisoobaya geeddi-socodka dhismaha dawladdan curdinka ah, waxaana halisgalaya amniga dalka. Sidaa darteed, aad bay muhiim u tahay in daneeyayaasha faraha badani mudnaanta siiyaan fursadaha shaqo abuurka dhallinyarada.

HERITAGE

I N S T I T U T E